174. Dadow waxaa idiin yimid Xujo Xagga Eebe ah waxaanan idiin soo Dejinay Nuur Cad.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدۡ جَآءَكُم بُرۡهَٰنٞ مِّن رَّبِّكُمۡ
وَأَنزَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ نُورٗا مُّبِينٗا ﴿١٧٤﴾

175. Kuwa rumeeyase Eebe oo Qabsaday (isku dhawray) Eebe (iyo Quraanka) wuxuu Galin Naxariis xaggiisa ah iyo Fadli wuxuuna ku Hanuunin Xaggiisa Jid Toosan.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَٱعۡتَصَمُواْ بِهِۦ
فَسَيُدۡخِلُهُمۡ فِي رَحۡمَةٖ مِّنۡهُ وَفَضۡلٖ وَيَهۡدِيهِمۡ
إِلَيۡهِ صِرَٰطٗا مُّسۡتَقِيمٗا ﴿١٧٥﴾

176. Waxbay ku warsan, waxaad dhahdaa Eebaa idiin Fidyoon Kalaalada, hadduu dhinto Ruux aan ILmo lahayn oo leh Walaashiis waxay Mudan Nus wuxuu ka tagay isaguna wuu Dhaxli hadduusan ILmo u sugnaanin, hadday Labo yihiina waxay Mudan Labo Dalool wuxuu ka tagay, hadday yihiin Walaal Rag iyo Haween ah kan Lab waxaa u sugnaaday Labo Dhadig Qaybtood, wuxuu idiin caddayn Eebe (Xaqa) inaydaan Dhumin Eebana wax kasta waa Ogyahay.

يَسۡتَفۡتُونَكَ قُلِ ٱللَّهُ يُفۡتِيكُمۡ فِي ٱلۡكَلَٰلَةِۚ
إِنِ ٱمۡرُؤٌاْ هَلَكَ لَيۡسَ لَهُۥ وَلَدٞ وَلَهُۥٓ أُخۡتٞ فَلَهَا
نِصۡفُ مَا تَرَكَۚ وَهُوَ يَرِثُهَآ إِن لَّمۡ يَكُن لَّهَا
وَلَدٞۚ فَإِن كَانَتَا ٱثۡنَتَيۡنِ فَلَهُمَا ٱلثُّلُثَانِ مِمَّا تَرَكَۚ
وَإِن كَانُوٓاْ إِخۡوَةٗ رِّجَالٗا وَنِسَآءٗ فَلِلذَّكَرِ مِثۡلُ
حَظِّ ٱلۡأُنثَيَيۡنِۗ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمۡ أَن تَضِلُّواْۗ
وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمُۢ ﴿١٧٦﴾

Ciddii iska kibrisa ama iska waynaysa Cibaadada Eebe wuxuu la kulmi Eebe wuuna Abaal marin, Nabi Ciise iyo Malaa'igta Eebana iskama kibriyaan. Mana haboona in Cidna iska waynayso Cibaadada Eebe. Suuradduna waxay ku Dhamaatay waxay ku Bilaabatay oo ah Dhaxalka si aan loo Dhumin Xaqana looga leexan ee loo Raaco Qaybta Eebe iyo Sharcigiisa Caadilka ah. An-Nisaa' (172-176).

## Suurat Al-Maa'idah

## سُورَةُ المَائِدَة

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa Ee Naxariis Guud iyo mid Gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Kuwa (Xaqa) Rumeeyoow Oofiya Ballanka, waxaa Laydiin Baneeyey Xoolaha Nicmoolayda waxa laydinku Akhrin Korkiinna Mooyee idinkoon banaysanayn Ugaadhsiga idinkoo xarman Eebana wuxuu Xukumaa wuxuu Doono.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَوۡفُواْ بِٱلۡعُقُودِۚ أُحِلَّتۡ
لَكُم بَهِيمَةُ ٱلۡأَنۡعَٰمِ إِلَّا مَا يُتۡلَىٰ عَلَيۡكُمۡ غَيۡرَ مُحِلِّي
ٱلصَّيۡدِ وَأَنتُمۡ حُرُمٌۗ إِنَّ ٱللَّهَ يَحۡكُمُ مَا يُرِيدُ ﴿١﴾

2. Kuwa (xaqa) Rumeeyow ha Banaysanina Calaamooyinka Eebe (waxa reeban) iyo Bisha Xurmaysan iyo Hadyada iyo Midda loo Luqun Xidhay (Hadyada Baydka) iyo kuwa u Qasdi Baydka Xurmaysan, iyagoo Dooni Fadliga Eebahood iyo Raali ahaanshihiisa, Markaad Xalaalowdaanna (Dhamaysaan Xajka iyo Cumrada) Ugaadhsada (hadaad Doontaan) yeyna Idin ku Xambaarin Cadhada Qoom idinka Celiyey Masaajidka Xurmaysan inaad Xad gudubtaan, Isugu kaalmeeya Samaha iyo Dhawrsiga hana Isugu Kaalmaynina Dambi iyo Colnimo, kana Dhawrsada Eebe, Ilaahay way darantahay Ciqaabtiisu,

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تُحِلُّوا۟ شَعَـٰٓئِرَ ٱللَّهِ
وَلَا ٱلشَّهْرَ ٱلْحَرَامَ وَلَا ٱلْهَدْىَ وَلَا ٱلْقَلَـٰٓئِدَ
وَلَآ ءَآمِّينَ ٱلْبَيْتَ ٱلْحَرَامَ يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِّن رَّبِّهِمْ
وَرِضْوَٰنًا ۚ وَإِذَا حَلَلْتُمْ فَٱصْطَادُوا۟ ۚ وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ
شَنَـَٔانُ قَوْمٍ أَن صَدُّوكُمْ عَنِ ٱلْمَسْجِدِ
ٱلْحَرَامِ أَن تَعْتَدُوا۟ ۘ وَتَعَاوَنُوا۟ عَلَى ٱلْبِرِّ وَٱلتَّقْوَىٰ ۖ
وَلَا تَعَاوَنُوا۟ عَلَى ٱلْإِثْمِ وَٱلْعُدْوَٰنِ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۖ إِنَّ
ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٢﴾

Suuraddan waxaa la Dhahaa Suuratul Maa'ida, waxayna Kulmisatay Xukumo badan, Aayadahanna wuxuu Eebe Fari Dadka inay Oofiyaan Ballamada wuxuuna u Caddeeyey in loo Banneeyey Cunnada Xoolaha marka laga Reebo waxa lagu Akhriyey iyo Ugaadhsiga iyagoo Xarman, Wuxuuna ku Booriyey inayna ku Xad gudbin kuna Dacatiyin, Calaamadda Eebe iyo waynaantiisa, iyo Bisha Xurmaysan, iyo Hadyada la Calaameeyey iyo kuwa ku Socda Guriga Xurmaysan, iyagoo Dooni Khayrka Eebe iyo Raalli ahaanshihiisa, markay Xalaaloobaanna way Ugaadhsan karaan, mana Haboona in Caddaaladda sina looga Tago, waase in khayrka laysugu Kaalmeeyo oon Xumaanta laysugu kaalmaynin, Illeen waxaa daran Ciqaabta Eebe.
Caa'isha waxay Tidhi: Suuraddan waa wixii u Dagid Dambeeyey ee waxay Banaysana Cuna waxay Reebtana Daaya. iyo Waxay kala gataan ama ku Heshiiyaan. Al-Maa'idah (1-2).

---

3. Waxaa laydinka Xarrimay Bakhtiga iyo dhiigga iyo Hilibka Doofaarka iyo wixii lagu Xuso (Lagu Gawraco) waxaan magaca Eebe ahayn, iyo tii la Ceejiyo, iyo la Ganac gooyo, iyo tan meel ku dhacda, iyo Tii la Hardiyo, iyo Midduu Cunay bahal, waxaad Gawracdaan mooyee (waxaa kaloo reeban) wixii lagu gawraco Sanam, iyo inaad ku Nasiib doontaan Faal, kaasi waa Fisqi, maantayna ka quusteen kuwii Gaaloobay Diintiinna, Ee ha ka Cabsanina ee iga Cabsada, Maantaan idiin kaamilay (Dhameeyey) Diintiinna waxaana idiin Taamyeelay Korkiinna Nicmadayda waxaana idiinka Raalli noqday Islaamka Diin ahaan, Ciddii loo Dhibaateeyo Baahi inay cunaan wixii laga xaaraameeyey oon Falayn Dambi Eebe waa dambi dhaafe Naxariista.

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمُ ٱلْمَيْتَةُ وَٱلدَّمُ وَلَحْمُ ٱلْخِنزِيرِ وَمَآ
أُهِلَّ لِغَيْرِ ٱللَّهِ بِهِۦ وَٱلْمُنْخَنِقَةُ وَٱلْمَوْقُوذَةُ
وَٱلْمُتَرَدِّيَةُ وَٱلنَّطِيحَةُ وَمَآ أَكَلَ ٱلسَّبُعُ إِلَّا مَا
ذَكَّيْتُمْ وَمَا ذُبِحَ عَلَى ٱلنُّصُبِ وَأَن تَسْتَقْسِمُوا۟
بِٱلْأَزْلَـٰمِ ۚ ذَٰلِكُمْ فِسْقٌ ۗ ٱلْيَوْمَ يَئِسَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟
مِن دِينِكُمْ فَلَا تَخْشَوْهُمْ وَٱخْشَوْنِ ۚ ٱلْيَوْمَ
أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِى
وَرَضِيتُ لَكُمُ ٱلْإِسْلَـٰمَ دِينًا ۚ فَمَنِ ٱضْطُرَّ فِى
مَخْمَصَةٍ غَيْرَ مُتَجَانِفٍ لِّإِثْمٍ ۙ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ
رَّحِيمٌ ﴿٣﴾

4. waxay ku warsan maxaa loo Xalaaleeyey waxaad dhahdaa waxaa laydiin xallilay Wanaagga (Xalaasha) iyo waxaad wax barteen oo wax Dhaawaca idinkoo ku ugaadhsan, ood baraysaan wuxuu idin baray Eebe ee *ka* cuna waxay idiin qabtaan ku Xusana Magaca Eebe kana Dhawrsada Eebe, ILaahay waa deg degtaa Xisaabtiisuye.

يَسْـَٔلُونَكَ مَاذَآ أُحِلَّ لَهُمْۖ قُلْ أُحِلَّ لَكُمُ ٱلطَّيِّبَٰتُ
وَمَا عَلَّمْتُم مِّنَ ٱلْجَوَارِحِ مُكَلِّبِينَ تُعَلِّمُونَهُنَّ مِمَّا
عَلَّمَكُمُ ٱللَّهُۖ فَكُلُوا۟ مِمَّآ أَمْسَكْنَ عَلَيْكُمْ وَٱذْكُرُوا۟ ٱسْمَ
ٱللَّهِ عَلَيْهِۖ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٤﴾

waxa wax Dhiboo dhan Eebe wuu Reebay, Sida Bakhtiga, Dhiigga, Hilibka Doofaarka iyo wixii Magaca Eebe waxaan ahayn lagu Gawracay, waxaa si Gaar ah loo Sheegay inay Reebantahay tan la Ceejiyo, tan la ganac gooyo, tan Meel ka dhacda, Tan hardida ku Dhimata, tan bahal Cuno oon la Gawricin. waxaa kaloo Reeban waxa Sanamyada loo Gawraco iyo waxyaalo la Taagay, iyo wax lagu sameeyo Faal, waxaasuna waa Faasiqnimo, Maalintaas yeyna ka quusteen Gaaladu Diinta Islaamka, mana mudna in laga Cabsado ee waa in Eebe uun laga Cabsado, Eebana wuu Taam yeelay Diinta Islaamka ah iyo Nicmadiisa, wuxuuna inooga raalli noqday Diinta Islaamka waxa ka soo hadhayna waa wax kama jiraan, Ciddiise Baahata oon Xadgudbin Eebe waa u dhaafe Naxariista. Al-Maa'idah (3-4).

---

5. Maanta waxaa Laydiin Xalaaleeyey Wanaagga Cunada kuwa la siiyey Kitaabna Xalaalbuu idiin yahay, Cunadiinuna xalaalbay u tahay, iyo kuwa Dhawrsoon oo Mu'minaadka ah (Guurkooda) iyo kuwa Dhawrsoon oo ka Mid ah kuwa la siiyey Kitaabka oo idinka horreeyey haddaad siisaan ujuuradooda (Meherkooda) iyagoo Dhawrson oon Xumaan (Zino) Samaynayn Yeelanaynna Saaxiibbo (Xun) Ciddii ka Gaalowda Iimaanka wuu Hoobtay Camalkiisu wuxuuna ka mid noqon aakhiro kuwa Khasaaray.

ٱلْيَوْمَ أُحِلَّ لَكُمُ ٱلطَّيِّبَٰتُۖ وَطَعَامُ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟
ٱلْكِتَٰبَ حِلٌّ لَّكُمْ وَطَعَامُكُمْ حِلٌّ لَّهُمْۖ وَٱلْمُحْصَنَٰتُ
مِنَ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ وَٱلْمُحْصَنَٰتُ مِنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ
مِن قَبْلِكُمْ إِذَآ ءَاتَيْتُمُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ مُحْصِنِينَ
غَيْرَ مُسَٰفِحِينَ وَلَا مُتَّخِذِىٓ أَخْدَانٍۗ وَمَن يَكْفُرْ
بِٱلْإِيمَٰنِ فَقَدْ حَبِطَ عَمَلُهُۥ وَهُوَ فِى
ٱلْـَٔاخِرَةِ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٥﴾

6. Kuwa (xaqa) Rumeeyow Haddaad u Kacdaan Salaadda Dhaqa Wajiyadiinna, iyo Gacmihiinna Tan iyo Jiqilka (Xusulka) Masaxana Madaxiinna (Dhaqana) Lugihiina Tan iyo anqawyada haddaad Janaabo qabtaan isdaahiriya, Haddaad Buktaan ama Safartihiin ama ka timaadaan Kortag ama Istaabataan haween oydaan helayn Biyo ku Gagabaysta dhul daahir kuna Masaxa Wajigiinna iyo Gacmihiinna, idin lama doonayo Eebe inuu idin yeelo korkiinna Dhib wuxuuse

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِذَا قُمْتُمْ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ
فَٱغْسِلُوا۟ وُجُوهَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ إِلَى ٱلْمَرَافِقِ
وَٱمْسَحُوا۟ بِرُءُوسِكُمْ وَأَرْجُلَكُمْ إِلَى
ٱلْكَعْبَيْنِۚ وَإِن كُنتُمْ جُنُبًا فَٱطَّهَّرُوا۟ۚ وَإِن كُنتُم
مَّرْضَىٰٓ أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَآءَ أَحَدٌ مِّنكُم مِّنَ ٱلْغَآئِطِ
أَوْ لَٰمَسْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَلَمْ تَجِدُوا۟ مَآءً فَتَيَمَّمُوا۟
صَعِيدًا طَيِّبًا فَٱمْسَحُوا۟ بِوُجُوهِكُمْ

dooni inuu idin Daahiriyo idiin dhammeeyo Nicmadiisa korkiinna inaad Shugridaan Darteed.

وَأَيْدِيكُم مِّنْهُ مَا يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيَجْعَلَ
عَلَيْكُم مِّنْ حَرَجٍ وَلَٰكِن يُرِيدُ لِيُطَهِّرَكُمْ
وَلِيُتِمَّ نِعْمَتَهُۥ عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ
تَشْكُرُونَ ٦

Halkan wuxuu Eebe ku sheegay in loo Banneeyey Mu'miniinta Cunnada Xalaasha ah, iyo Cunnada kuwa Kitaabka leh, iyo Haweenka Dhawrsoon oo Mu'miniinta ah, iyo kuwa Kitaabka leh ee naga horeeyey marka la siiyo maherkooda ee dhawrsoon, Ciddiise xaqa iyo Iimaanka ka Gaalowda waa mid buray Camalkiisu oo khasaaray.
Sayid Cumar waxaa laga Sheegay: waxaan doonay inaanan u ogolaan Ruux Xumaan (Zino) Sameeyey inuu Guursado haweenay Dhawrsoon. aayadda kale waxay ka warrami Waysada iyo in la dhaqi Wajiga, Gacmaha tan iyo Jiqillada, madaxana la masixi, Lugahana la dhaqi tan iyo Anqawyada, Janaabadana laga maydhan, ciddii Jiran ama Safar ah ama Kortag ka timid ama haween Taabta oon Biya helinna inuu Carrada ku. Gagabaysan oo marin Wajiga iyo Gacmaha, waana Fududayn Eebe iyo inuu idiin Muujiyo Nicmadiisa iyo inaan ku mahdinno. Al-Maa'idah (5-6).

---

7. Xusuusta Nicmada Eebe iyo Ballankiisa uu idin kula Ballamay markaad Dhahdeen waan maqalay waana adeecnay kana Dhawrsada Eebe ILleen ILaahay waa Ogyahay waxa Laabta ku Sugane.

وَٱذْكُرُوا۟ نِعْمَةَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَمِيثَٰقَهُ
ٱلَّذِى وَاثَقَكُم بِهِۦٓ إِذْ قُلْتُمْ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۖ
وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ٧

8. Kuwa (xaqa) Rumeeyow Noqda kuwa Istaaga (u Darban) dar Eebe oo ku marag kaca Caddaalad yeyna idinku Xambaarin Cadhada qoom inaydaan Caddaalad falin, Caddaalad fala iyadaa u dhaw Dhawrsashada (Eebe) kana Dhawrsada ILaahay, Eebe waa Ogyahay waxaad falaysaane.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ كُونُوا۟ قَوَّٰمِينَ لِلَّهِ
شُهَدَآءَ بِٱلْقِسْطِ ۖ وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ
شَنَـَٔانُ قَوْمٍ عَلَىٰٓ أَلَّا تَعْدِلُوا۟ ۚ ٱعْدِلُوا۟ هُوَ
أَقْرَبُ لِلتَّقْوَىٰ ۖ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرٌۢ
بِمَا تَعْمَلُونَ ٨

9. Wuxuu u Yaboohay Eebe kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican inuu u sugnaaday Dambi dhaaf iyo Ajir wayn.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ ۙ
لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ٩

10. Kuwa Gaaloobay oo Beeniyey Aayaadkannaga kuwaasu waa Asaxaabta (Ehelka) Jaxiimo.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ أُو۟لَٰٓئِكَ
أَصْحَٰبُ ٱلْجَحِيمِ ١٠

11. Kuwa (xaqa) Rumeeyow Xusuusta Nicmada Eebe korkiinna markay Hamiyeen «dooneen» qoom inay idinku Fidiyaan (Xumaan) Gacmahooda oo (Eebe) idinka reebay Gacmohooda

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ
عَلَيْكُمْ إِذْ هَمَّ قَوْمٌ أَن يَبْسُطُوٓا۟ إِلَيْكُمْ
أَيْدِيَهُمْ فَكَفَّ أَيْدِيَهُمْ عَنكُمْ ۖ وَٱتَّقُوا۟

Xaggiina kana Dhawrsada Eebe, Ilaahayna ha tala Saarteen Mu'miniintu.

ٱللَّهَ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

Aayadahan wuxuu Eebe fari Dadka Mu'miniinta ah inay Xusuustaan Nicmadiisa oo ah inuu u soo Dejiyey Sharcigan toosan, una soo Diray Rasuul, iyo Ballankii uu ka qaaday inay xaqa u gargaaraan oyna Aqbaleen, iyo inay Eebaha wax walba og ka Dhawrsadaan, waxaa kale oo uu faray inay Caddaaladda ku Dadaalaan Xaataa Dadkay Colka Yihiin Saasaana u Dhaw Xaqa iyo Wanaagga, markaasuu Eebe Caddeeyey abaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa Gaaloobay, iyo in Eebe ka Dhawray Cadaw isku dayey inay Xumaan ku falaan, oyna Mudanyihiin inay Eebe tala saartaan, waxaa Sugnaatay inay Muslimiintii la Ballantemeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Si kastoo Yihiinba inay xaqa u Gargaaraan. Eebana waa kan kadhawray Nabiga Cadowgii isku Dayey inuu wax yeelleeyo Yuhuud iyo Kuwa kalaba. Al-Maa'idah (7-11).

---

12. Dhab ahaanbuu u qaaday Eebe Ballanka Banii'Israa'iil, waxaana ka Bixinay Xaggooda Labo iyo toban Madax ah, wuxuuna Yidhi Eebe anagu waan idin la jiraa Haddaad Oogtaan Salaadda oo Bixisaan Zakada ood Rumaysaan Rasuuladayda, ood una Gargaartaan oo amaah gashataan Eebe amaah (Sadaqo) Fiican waxaan ka Asturi Xaggiinna Xumaanta waxaana idin galin Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal Ruuxii Gaalooba intaas ka Dib oo idin Ka mid ah wuxuu ka Dhumay Jidka Toosan.

۞ وَلَقَدْ أَخَذَ ٱللَّهُ مِيثَٰقَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
وَبَعَثْنَا مِنْهُمُ ٱثْنَىْ عَشَرَ نَقِيبًا ۖ وَقَالَ ٱللَّهُ
إِنِّى مَعَكُمْ ۖ لَئِنْ أَقَمْتُمُ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَيْتُمُ
ٱلزَّكَوٰةَ وَءَامَنتُم بِرُسُلِى وَعَزَّرْتُمُوهُمْ
وَأَقْرَضْتُمُ ٱللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا لَّأُكَفِّرَنَّ
عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ وَلَأُدْخِلَنَّكُمْ جَنَّٰتٍ
تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۚ فَمَن كَفَرَ
بَعْدَ ذَٰلِكَ مِنكُمْ فَقَدْ ضَلَّ سَوَآءَ
ٱلسَّبِيلِ ﴿١٢﴾

13. Burintooda Ballankooda (Yuhuud) yaan u Lacnadnay kana Yeellay Quluubtooda mid Ingagan, iyagoo ka leexin Kalimada meejeeda waxayna halmaameen qayb ka mid wixii lagu waaniyey kamana waydid Xaggooda inaad ku aragtid Khayaamo wax yar mooyee ee iska Cafi iskana Saamax Eebe wuxuu Jecelyahay samo Falayaashee.

فَبِمَا نَقْضِهِم مِّيثَٰقَهُمْ لَعَنَّٰهُمْ وَجَعَلْنَا
قُلُوبَهُمْ قَٰسِيَةً ۖ يُحَرِّفُونَ ٱلْكَلِمَ
عَن مَّوَاضِعِهِۦ ۙ وَنَسُوا۟ حَظًّا مِّمَّا ذُكِّرُوا۟ بِهِۦ ۚ
وَلَا تَزَالُ تَطَّلِعُ عَلَىٰ خَآئِنَةٍ مِّنْهُمْ إِلَّا قَلِيلًا مِّنْهُمْ ۖ
فَٱعْفُ عَنْهُمْ وَٱصْفَحْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ
ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٣﴾

Halkanna wuxuu Eebe ka Qisoon Banii Israa'iil iyo in Eebe ka Soo Saaray Labo iyo Toban Madax ah kuna Yidhi waan idinla Jiraa haddaad Oogtaan Salaadda, oo Bixisaan Zakada, ood Rumaysaan Rasuuladayda, ood U gargaartaan ood wanaag Eebe Amaahsataan, uuna Asturi Xumaantooda uuna galin Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal, Ciddiise ka dib Gaalowda wuxuu ka Dhumay Jidka Toosan. waase la Lacnaday Qalbi ingeegooda iyo ka Leexinta hadalka meelihiisa, waxayna halmaameen wax badan oo lagu waaniyey, Khayaamana lagama waayo Badankooda, ee iska Dhaaf hana ku dhibin naftaada Eebe wuxuu Jecelyahay Samafaleyaashee.
waana taas Dabeecadda Yuhuud iyo wixii la mid ah, Waxaase waajib ah in laga Digtoonaadaa layskuna dayo in la toosiyo. Al-Maa'idah (12-13).

14. Kuwa Yidhi waxaan nahay Nasaara waxaan ka qaadnay Ballankooda waxayna halmaameen qayb wixii lagu Waaniyey, markaasaan ku sii daynay Dhexdooda Colnimo iyo Cadho Tan iyo Maalinta Qiyaame, wuuna uga warrami Eebe waxay Samaynayeen.

وَمِنَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّا نَصَٰرَىٰٓ أَخَذۡنَا
مِيثَٰقَهُمۡ فَنَسُواْ حَظّٗا مِّمَّا ذُكِّرُواْ بِهِۦ
فَأَغۡرَيۡنَا بَيۡنَهُمُ ٱلۡعَدَاوَةَ وَٱلۡبَغۡضَآءَ إِلَىٰ يَوۡمِ
ٱلۡقِيَٰمَةِۚ وَسَوۡفَ يُنَبِّئُهُمُ ٱللَّهُ
بِمَا كَانُواْ يَصۡنَعُونَ ١٤

15. Ehelu Kitaabow waxaa idiin Yimid Rasuulkannaga oo idiin Caddayn wax badan ood ahaydeen kuwo ka qariya Kitaabka (Tawreed) wuxuuna idinka Cafiyi wax badan, waxaana idiinka Yimid Xagga Eebe Nuur iyo Kitaab Cad.

يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ قَدۡ جَآءَكُمۡ
رَسُولُنَا يُبَيِّنُ لَكُمۡ كَثِيرٗا مِّمَّا
كُنتُمۡ تُخۡفُونَ مِنَ ٱلۡكِتَٰبِ
وَيَعۡفُواْ عَن كَثِيرٖۚ قَدۡ جَآءَكُم
مِّنَ ٱللَّهِ نُورٞ وَكِتَٰبٞ مُّبِينٞ ١٥

16. Uuna ku Hanuuniyo Eebe Ruuxii Raaca Raalli ahaanshihiisa Jidka Nabadgalyada kana bixin Mugdiyada Xagga Nuurka Idinkiisa kuna hanuunin jidka Toosan.

يَهۡدِي بِهِ ٱللَّهُ مَنِ ٱتَّبَعَ رِضۡوَٰنَهُۥ
سُبُلَ ٱلسَّلَٰمِ وَيُخۡرِجُهُم مِّنَ
ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذۡنِهِۦ
وَيَهۡدِيهِمۡ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ١٦

17. Waxaa Gaaloobay kuwa yidhi Eebe waa uun Masiixi Ibnu maryama, yaa uga Hanan Eebe waxba hadduu doono inuu Halaago Masiixi Ibnu Maryama iyo Hooyadiis iyo waxa Dhulka ku sugan Dhammaan, Eebaa iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa u Dhaxeeya, wuxuuna abuuraa wuxuu Doono Eebana wax kasta wuu karaa.

لَّقَدۡ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ
ٱلۡمَسِيحُ ٱبۡنُ مَرۡيَمَۚ قُلۡ فَمَن يَمۡلِكُ مِنَ
ٱللَّهِ شَيۡـًٔا إِنۡ أَرَادَ أَن يُهۡلِكَ ٱلۡمَسِيحَ
ٱبۡنَ مَرۡيَمَ وَأُمَّهُۥ وَمَن فِي ٱلۡأَرۡضِ
جَمِيعٗاۗ وَلِلَّهِ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا بَيۡنَهُمَاۚ يَخۡلُقُ مَا يَشَآءُۚ وَٱللَّهُ
عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ١٧

Kuwa sheegta inay Nasaara yihiin wuxuu Eebe ka qaaday ballan inay Rumeeyaan una Gargaaraan Nabiga Muxamad ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wayse Halmaameen oo iska diideen arrintaas, markaasaa Eebe Dhexdhigay Col iyo Cadho Tan iyo Qiyaame, Eebana wuu uga warrami oo ka abaal marin waxay falayeen.
Ehelu Kitaabkow waxaa idiin yimid Rasuulka Eebe oo idiin Caddayn wax Badan ood qarinaysaan, idinka cafin wax badan, xagga Eebana waxaa idiinka Yimid Nuur iyo quraan Cad kuna Hanuuniyo Eebe Jidka Nabadgalyo Ciddii Raacda Raalli ahaanshihiisa, iyo Jidka Nuurka ah ee Toosan.
Waxaa Dhab u Gaaloobay kuwa Yidhi Eebe waa Ciise Ibnu Maryama, Yaase Eebe ka Celin Hadduu Halaago Ciise iyo Hooyadiis iyo waxa Dhulka ku sugan Dhammaan Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa Udhaxeeyana Eebaa Iska leh wuxuu Doono Yuu abuuraa, wax walbana wuu karaa, Eebana waa kali Awoodleh. Al-Maa'idah (14-17).

18. Waxay Dheheen Yuhuud iyo Nasaaraba anagu waxaan nahay Caruur Eebe iyo kuwuu Jecelyahay waxaad Dhahdaa Muxuu idiinku Cadaabaa dambigiinna saas ma aha ee waxaad Tihiin Dadka Eebe Abuuray, wuu u Dhaafi Cidduu Doono wuuna Cadaabi Cidduu Doono, Eebana waxaa u sugnaaday Xukunka Samooyinka, iyo Dhulka iyo waxa u Dhexeeya Xaggiisaana loo ahaan.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ وَٱلنَّصَـٰرَىٰ نَحْنُ أَبْنَـٰٓؤُا۟ ٱللَّهِ
وَأَحِبَّـٰٓؤُهُۥ ۚ قُلْ فَلِمَ يُعَذِّبُكُم بِذُنُوبِكُم ۖ بَلْ أَنتُم
بَشَرٌ مِّمَّنْ خَلَقَ ۚ يَغْفِرُ لِمَن يَشَآءُ وَيُعَذِّبُ مَن
يَشَآءُ ۚ وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ
وَمَا بَيْنَهُمَا ۖ وَإِلَيْهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

19. Ehelu Kitaabow waxaa idiin Yimid Rasuulkanagii isagoo Idiin Caddayn Muddo (kadib) rasuulada inaydaan dhihin nooma Imaan Bishaareeye iyo Dige, Eebana wax kasta wuu karaa.

يَـٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَـٰبِ قَدْ جَآءَكُمْ رَسُولُنَا يُبَيِّنُ لَكُمْ
عَلَىٰ فَتْرَةٍ مِّنَ ٱلرُّسُلِ أَن تَقُولُوا۟ مَا جَآءَنَا مِنۢ بَشِيرٍ
وَلَا نَذِيرٍ ۖ فَقَدْ جَآءَكُم بَشِيرٌ وَنَذِيرٌ ۗ وَٱللَّهُ
عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٩﴾

20. (Xusuuso) Markuu ku Yidhi (Nabi) Muuse Qoomkiisa, Qoomkayow Xusuusta Nicmada Eebe ee korkiinna markuu yeelay Dhexdiinna Nabiyo idinkana yeelay Xukaam idinsiiyeyna waxaan la siin Cid Caalamka ah, (Waqtigiinnii).

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦ يَـٰقَوْمِ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَةَ
ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ جَعَلَ فِيكُمْ أَنۢبِيَآءَ وَجَعَلَكُم
مُّلُوكًا وَءَاتَىٰكُم مَّا لَمْ يُؤْتِ أَحَدًا مِّنَ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿٢٠﴾

21. Qoomkayow gala Dhulka la Daahiriyey oo idiinyaboohay Eebe hana u noqonina Gadaashiinna oo gadoontaan idinkoo Khasaaray.

يَـٰقَوْمِ ٱدْخُلُوا۟ ٱلْأَرْضَ ٱلْمُقَدَّسَةَ ٱلَّتِى كَتَبَ ٱللَّهُ
لَكُمْ وَلَا تَرْتَدُّوا۟ عَلَىٰٓ أَدْبَارِكُمْ فَتَنقَلِبُوا۟ خَـٰسِرِينَ ﴿٢١﴾

Yuhuud iyo Nasaara iyo Gaaladaba waxay ku hadlaan Haddallo Xun, Siday halkan ku sheegeen inay yihiin Caruurtii Eebe, iyo kuwo uu Jecelyahay, Taasise waa Been ee waa Dad ka mid ah khalqiga uu abuuray, wuuna Cadaabi Eebana wuu ka diigtoonyahey Khalqiga, waxaana u sugnaaday Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Xaggiisaana loo ahaan.
Waxaana idiin soo diray Rasuulkanaga Muddo Rasuulada Ka dib, Saydaan u Dhihin nooma imaan Bishaareeye iyo Dige, wuuse idiin yimid, Nabi Muusena wuu waaniyey Banii Israa'iil wuxuuna Xusuusiyey Nicmada Eebe iyo Nabiyada uu u soo diray kana yeelay Xukaam waqtigoodii, wuxuuna faray inay Galaan Dhulka daahirka ah Qudsi. waxaana wax laga xishooda ah Magaaladaas Barakaysan ay Gaalada Yahuuddu ay Xoog ku qabsadeen. Dhulka Eebaa leh, waxaana xaq u leh inuu ku noolaado Muslim Mu'min ah, waana inay ku soo noqoto Qudsi Gacanta Muslimiinta. Al-Maa'idah (18-21).

---

22. Waxay dheheen Muusow waxaa (Dhulka) Dhexdiisa ah qoom daran mana galayno intay ka baxaan xaggeeda hadday ka baxaanna waanu gali.

قَالُوا۟ يَـٰمُوسَىٰٓ إِنَّ فِيهَا قَوْمًا جَبَّارِينَ وَإِنَّا لَن
نَّدْخُلَهَا حَتَّىٰ يَخْرُجُوا۟ مِنْهَا فَإِن يَخْرُجُوا۟
مِنْهَا فَإِنَّا دَٰخِلُونَ ﴿٢٢﴾

23. waxay Dheheen Labo Nin oo ka mid ah kuwa ka Cabsada (Eebe) una Nicmeeyey Eebe uga gala albaabka Markaad gashaan idinkaa Adkaane, Eebana tala saarta haddaad Mu'miniin tihiin.

قَالَ رَجُلَانِ مِنَ الَّذِينَ يَخَافُونَ أَنْعَمَ اللَّهُ
عَلَيْهِمَا ادْخُلُوا عَلَيْهِمُ الْبَابَ فَإِذَا دَخَلْتُمُوهُ
فَإِنَّكُمْ غَالِبُونَ ۚ وَعَلَى اللَّهِ فَتَوَكَّلُوا
إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٢٣﴾

24. Waxay dheheen Muusow anagu ma galaynno Waligeed intay joogaan ee taga adiga iyo Eebaha oo la dagaalama anagu halkanaan Fadhiyeynaaye.

قَالُوا يَا مُوسَىٰ إِنَّا لَن نَّدْخُلَهَا أَبَدًا مَّا دَامُوا فِيهَا ۖ
فَاذْهَبْ أَنتَ وَرَبُّكَ فَقَاتِلَا إِنَّا هَاهُنَا
قَاعِدُونَ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse Eebow ma hanto Naftayda iyo Walaalkay Mooyee ee nakala Bixi (Xukun) Dhexdannada iyo Qoomka Faasiqiinta ah (Xun).

قَالَ رَبِّ إِنِّي لَا أَمْلِكُ إِلَّا نَفْسِي وَأَخِي ۖ فَافْرُقْ
بَيْنَنَا وَبَيْنَ الْقَوْمِ الْفَاسِقِينَ ﴿٢٥﴾

26. (Eebe) Wuxuu Yidhi iyadu «Dhulka» waa ka Xaaraan korkooda Afartan Sano oy ku Wareeri Dhulka ee haw Murugoon qoomka Faasiqiinta ah.

قَالَ فَإِنَّهَا مُحَرَّمَةٌ عَلَيْهِمْ ۛ أَرْبَعِينَ سَنَةً ۛ
يَتِيهُونَ فِي الْأَرْضِ ۚ فَلَا تَأْسَ عَلَى الْقَوْمِ
الْفَاسِقِينَ ﴿٢٦﴾

Mana habboona in Fulayadii Diiday Inay Galaan Qudsi waqtigii Nabi Muuse iyo kuwa ka Liita ay Xoog ku qabsadeen Magaaladaas.
Waxaase lagaga Kicin karaa in Dhab ahaan xaqa loo Rumeeyo Jidka Eebana Dhab loogu Jahaado, Muslimiintuna isku mid noqdaan, Iyagoo ku Toosan Sharciga Eebe ee Wanaagsan, haddii kale waxaa ku Dhici Muslimiinta wareerkii ku Dhacay Banii Israa'iil, waana looga Adkaan Dhulka waxayna noqon kuwo ka baxay Daacada iyo Sharciga Eebe, wax loo murugoodana noqon maayaan, Sidii Eebe u Sheegay Nabi Muuse, waana in laga leexdo Wadada Yuhuud. Al-Maa'idah (22-26).

---

27. Ku Akhri Korkooda warka Labadii Wiil ee Ilmo Nabi aadam ahayd si dhab ah, markay Dhaweeyeen (Sadaqaysteen) Sadaqo oo laga Aqbalay Midkood lagana aqbalin kii kale, oo uu Yidhi waan ku Dili uu Yidhi (Kii kale) wuxuu uun Eebe ka aqbalaa kuwa Dhawrsada.

۞ وَاتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ ابْنَيْ آدَمَ بِالْحَقِّ إِذْ قَرَّبَا
قُرْبَانًا فَتُقُبِّلَ مِنْ أَحَدِهِمَا وَلَمْ يُتَقَبَّلْ مِنَ الْآخَرِ
قَالَ لَأَقْتُلَنَّكَ ۖ قَالَ إِنَّمَا يَتَقَبَّلُ اللَّهُ
مِنَ الْمُتَّقِينَ ﴿٢٧﴾

28. Haddaad u soo Fidiso Xaggayga Gacantaada inaad i disho anigu kugu Fidin maayo gacanta inaan ku dilo Anugu waxaan ka Cabsan Ilaahay ee ah Eebaha Caalamka.

لَئِن بَسَطتَ إِلَيَّ يَدَكَ لِتَقْتُلَنِي مَا أَنَا بِبَاسِطٍ يَدِيَ
إِلَيْكَ لِأَقْتُلَكَ ۖ إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ رَبَّ الْعَالَمِينَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaana Dooni inaad la Noqoto Dambigayga iyo kaagaba ood noqoto Naarta Ehelkeeda Taasina waa Abaalka Daalimiinta.

إِنِّىٓ أُرِيدُ أَن تَبُوٓأَ بِإِثْمِى وَإِثْمِكَ فَتَكُونَ
مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلنَّارِ ۚ وَذَٰلِكَ جَزَٰٓؤُا۟ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٩﴾

30. Markaasay u qurxisay Naftiisii Dilka Walaalkiis Wuuna Dilay wuxuuna Noqday kuwa Khasaaray.

فَطَوَّعَتْ لَهُۥ نَفْسُهُۥ قَتْلَ أَخِيهِ فَقَتَلَهُۥ فَأَصْبَحَ
مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٣٠﴾

31. Wuxuuna Eebe u Bixiyey (Muujiyey) Tuke Faadhi Dhulka inuu Tusiyo siduu u Asturo Maydka Walaalkiis, wuxuuna Yidhi Shalaytee miyaan ka Cajisay inaan noqdo Sida Tukahan oon Asturo Maydka Walaalkay wuxuuna ahaaday mid Qoomamooda.

فَبَعَثَ ٱللَّهُ غُرَابًا يَبْحَثُ فِى ٱلْأَرْضِ لِيُرِيَهُۥ
كَيْفَ يُوَٰرِى سَوْءَةَ أَخِيهِ ۚ قَالَ يَٰوَيْلَتَىٰٓ
أَعَجَزْتُ أَنْ أَكُونَ مِثْلَ هَٰذَا ٱلْغُرَابِ فَأُوَٰرِىَ
سَوْءَةَ أَخِى ۖ فَأَصْبَحَ مِنَ ٱلنَّٰدِمِينَ ﴿٣١﴾

Aayadahani waxay ka warami wixii dhex maray Labadii Wiil ee Nabi Aadam oo ahaa Mid Fiican iyo Mid Xun, kaasoo xasad iyo Gardarro u Dilay Walaalkiis in Eebe ka Aqbalay Sadaqadii, wuxuuna u sheegay inuusan isagu Rabin inuu Dilo Naf xaq darro, maxaayeelay Ciddii saas fasha waa mid daalim ah oo gali Naarta, markuu dilay Walaalkiisna wuu Khasaaray wuxuu falana wuu Garanwaayey intuu ka arko Tuke Qodi Dhulka, Markaasuu ku dayday si uu u Asturo una qariyo maydka walaalkiis isagoo qoomamayn, Kaasuna waa Xasad iyo Shaydaan Taladii iyo Dilkii Xaq darro ee u Horreeyey. waxaana Sugnaatay inuu Naf kasta oo XaqDarrro loo Dilo uu qayb ku Yeelan Wiilkaas. ILLeen Isagaa Jideeyey Dilkee. Saas Darteed waa in laga Fogaado Dil Xaq Darro ILLeen Abaalkiisu waa Naare. Al-Maa'idah (27-31).

---

32. Saas Darteed yaan ugu Jidaynay Banii-Israa'iil Cidii Disha Naf aan (Dilin) Naf ama Fasaadin Dhulka waxay la mid tahay inuu Dilay Dadka Dhammaan, Ciddii Noolaysa Nafna (Korisa) Waxay la mid Tahay Isagoo Nooleeyey Dadkoo Dhan, Waxay ula Timid Rasuuladanadii Xujooyin Markaas in Badan oo ka mida Intaas ka dib Dhulkay ku Xadgudbeen.

مِنْ أَجْلِ ذَٰلِكَ كَتَبْنَا عَلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ أَنَّهُۥ
مَن قَتَلَ نَفْسًۢا بِغَيْرِ نَفْسٍ أَوْ فَسَادٍ فِى ٱلْأَرْضِ
فَكَأَنَّمَا قَتَلَ ٱلنَّاسَ جَمِيعًا وَمَنْ أَحْيَاهَا
فَكَأَنَّمَآ أَحْيَا ٱلنَّاسَ جَمِيعًا ۚ وَلَقَدْ
جَآءَتْهُمْ رُسُلُنَا بِٱلْبَيِّنَٰتِ ثُمَّ إِنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم
بَعْدَ ذَٰلِكَ فِى ٱلْأَرْضِ لَمُسْرِفُونَ ﴿٣٢﴾

33. Abaalka kuwa la Dagaalama Eebe iyo Rasuulkiisa oo la Socda Dhulka Fasaad waa in la Dilo ama la Wadho, ama loo gooyo Gacmahooda iyo Lugahooda Isdhaaf, ama laga Fogeeyo Dhulka, arrintoodaasna waa inay Mudanyihiin Dulli Adduun iyo Aakhiro oo Cadaab Wayna.

إِنَّمَا جَزَٰٓؤُا۟ ٱلَّذِينَ يُحَارِبُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ
وَيَسْعَوْنَ فِى ٱلْأَرْضِ فَسَادًا أَن يُقَتَّلُوٓا۟
أَوْ يُصَلَّبُوٓا۟ أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ
وَأَرْجُلُهُم مِّنْ خِلَٰفٍ أَوْ يُنفَوْا۟ مِنَ ٱلْأَرْضِ ۚ
ذَٰلِكَ لَهُمْ خِزْىٌ فِى ٱلدُّنْيَا ۖ
وَلَهُمْ فِى ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٣٣﴾

34. Kuwa Toobad keena qabasho ka hor mooyee Ogaadana in Eebe Dambi Dhaafo oo Naxariisto.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُواْ مِن قَبۡلِ أَن تَقۡدِرُواْ عَلَيۡهِمۡۖ
فَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٣٤

35. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ka Dhawrsada Eebe una Doona Xaggiisa Dhawaansho kuna Jahaada Jidkiisa waxaad u Dhawdihiin inaad Liibaantaane.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَٱبۡتَغُوٓاْ
إِلَيۡهِ ٱلۡوَسِيلَةَ وَجَٰهِدُواْ فِي سَبِيلِهِۦ
لَعَلَّكُمۡ تُفۡلِحُونَ ٣٥

Eebe ma Jecla Xumaanta iyo Fasaadka ee wuxuu Jecelyahay Wanaagga iyo Khayrka, saasuuna u Dhawray Nafta Dadka oo Ciddii u Disha Naf xaq Darro waxay la Midtahay mid Dadkoo Dhan Dishay, Tii Noolaysa oo korisana waxay la mid tahay mid Dadkoo Dhan Noolaysay, Saasaana loo Ciqaabi Ciddii Diinta Eebe iyo Nabiga la Dagaalanta, oo Dhulka Fasaadisa, Waana in la Laayo ama Gacnaha iyo Lugaha is Dhaaf loo gooyo, ama la Wadho, ama Dhulka laga Eryo Iyagoo Dulloobay Aakhiro iyo Adduunba, Ciddiise intaan la Qabanin Toobadkeenta Eebe wuu u Dhaafi. Tan kale waa in ILaahay loogu Dhawaado Camal Fiican iyo Wanaag, Sida Salaadda, Zakada, Soonka, Xajka, Jahaadka, Sadaqada, Wax barashada iyo Baridda.
Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Wasiiladu Waa Dhawaansho, Qataadana wuxuu Yidhi: Ugu Dhawaada Eebe Daacadiisa iyo Wuxuu Jecelyahay.
Waxaana Xadiith ku Sugnaaday inay tahay Darajo Jannada Dhexdeeda ah oo ka Siiyo Cid Eebe Jecelyahay Sida Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Maa'idah (32-35).

---

36. Kuwa Gaaloobay hadduu u ahaado waxa Dhulka ku Sugan oo Dhan iyo wax la mid ah inay iskaga Furtaan Cadaabka Maalinta Qiyaame lagama Aqbaleen waxayna Mudan Cadaab Daran..

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡ أَنَّ لَهُم مَّا فِي ٱلۡأَرۡضِ
جَمِيعٗا وَمِثۡلَهُۥ مَعَهُۥ لِيَفۡتَدُواْ بِهِۦ مِنۡ عَذَابِ
يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ مَا تُقُبِّلَ مِنۡهُمۡۖ وَلَهُمۡ عَذَابٌ
أَلِيمٞ ٣٦

37. Waxay Dooni inay ka soo Baxaan Naarta kamana Baxaan Xaggeeda waxayna mudan Cadaab Joogta ah.

يُرِيدُونَ أَن يَخۡرُجُواْ مِنَ ٱلنَّارِ وَمَا هُم
بِخَٰرِجِينَ مِنۡهَاۖ وَلَهُمۡ عَذَابٞ مُّقِيمٞ ٣٧

38. Tuugga iyo Tuugadda Gooya Gacmahooda Abaalmarin waxay kasbadeen Darteed waana Xanuujin Eebe ILaahayna waa adkaade Falsan.

وَٱلسَّارِقُ وَٱلسَّارِقَةُ فَٱقۡطَعُوٓاْ أَيۡدِيَهُمَا جَزَآءَۢ
بِمَا كَسَبَا نَكَٰلٗا مِّنَ ٱللَّهِۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٞ ٣٨

39. Ciddiise Toobad keenta Dulmigiisa ka Dib oo Fiicnaada ILaahay wuu ka Toobad Aqbali, Eebana waa Dambi Dhaafe naxariista.

فَمَن تَابَ مِنۢ بَعۡدِ ظُلۡمِهِۦ وَأَصۡلَحَ فَإِنَّ ٱللَّهَ
يَتُوبُ عَلَيۡهِۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٌ ٣٩

40. Miyaadan Ogayn in Eebe u sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo Dhulka uuna Cadaabi Cidduu Doono,

أَلَمۡ تَعۡلَمۡ أَنَّ ٱللَّهَ لَهُۥ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلۡأَرۡضِ يُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ وَيَغۡفِرُ لِمَن يَشَآءُۗ

waana u dambi dhaafi Ciduu la doono ILaahayna wax kasta wuu karaa.

وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤٠﴾

Cadaabka Aakharo iyo Ciqaabteeda wax kasta oo Adduunka Jooga iyo wax la mid ahba waa layskaga Furanlahaa, lamase aqbalo, Gaalana lagama Bixiyo Naarta, waxayna Mudan Cadaab Joogta ah. Aayadaha kale waxay ka warrami farina in Tuugga la Gooyo Gacanta Rag iyo Haweenba, maxaayeelay waa Arrin Xun oo Diinta, Caqliga, iyo Abuuridda Fiicanba Diidi, sidee Ruux Caqli leh u Gali Guryo Dad ama u Jabsan, ama Xoolahooda u Kaxaysan si qarsoodi ah Isagoon ka Yaabayn Eebe, Dhawrayna Akhlaaqda, ILaalinayna Xaqa Walaalkiisa ku Dhibtamay xasilinta Xoolahaa, Kaas Abaalkiisu waa in laga Fogeeyo Gacanta Xun oo Bukta, kuwase Doqomada ah een wax kasayn ee wax ka sheegi Ciqaabta Tuugga, may u Naxariistaan Miskiinka la Xaday Dhididkiisii intay u Naxariisan Tuug, Mise Iyagaa Tuuga ah, Maxaase laga Faa'iiday Markii laga Tagay Arrintaas Sow cid Walba kuma Seexato Cabsi kumana soo Toosto Cabsi, Imisaase Tuugo dhacda Habeen iyo Dharaar, dadna lagu Dilaa, ood maqashaa Dhibaato aan laga Sheekaysan karin, Ma saasaa Roon mise in la qabto Tuugga Gacantiisa oo la Edbiyo, oo Dadka iyo Xoolohiisu Nabadgalyo ku Noolaadaan, Gaaladuse ma Eebay uga Naxariis badan yihiin Khalqigiisa, ha Abuurteen Iyagu Tuugo ayna gooynayn, oo haw Sameeyeen Cir iyo Dhul iyo Wadan ay Dagaan, hana ka Bexeen Wadanka iyo Dhulka Eebe, ILLeen Tuugo iyo Tuug ma Rabee.
Rasuulkuna (Naxarriis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Eebe ha Lacnado Tuug wuxuu Xadaa Ukun oo la Goyn Gacantiisa oos Xadi Xadhig oo la Goyn, Taasina waxay ku Tusin Naf Xumida Tuuga iyo kan Daba Joogaba, Naxariisina ma aha in Ruux Buka lagu sii Daayo Dadka ee waxaa Naxariis ah in la Daweeyo Khayrkana la Tusiyo Wanaagana lagu Hanuuniyo Shaqana loo yeelo Hadday Baahi Jirto, waxaannu Rumaysanahay Eebaha Falka San iyo Xukunkiisa Caadilka ah, ee ha u soo Noqdeen kuwaas Qalbiga ka Buka ee Tuugada Ayidi. Al-Maa'idah (36-40).

---

41. Rasuulow Yeyna ku Walbahaarin kuwa ku Dag dagi Gaalnimada oo ah kuwa ku Yidhi Afkooda waan Rumaynay ooyna Rumayn Quluubtoodu, iyo kuwa Yuhuudoobay waxay maqli ogyihiin Beenta waxayna maqli Ogyihiin qoom kale oon kuu Imaanin waxayna ka leexiyaan Kalimooyinka Meelaheeda (Dhabta) waxayna Odhan haddii laydinsiiyo kan (Leexsan) qaata haddaanse laydin siinin ka Digtoonaada, Ruxuu Doono Eebe Ibtilayntiisa waxba ugama hanatid Eebe waxba, kuwaasina waa kuwaan Eebe la Doonin inuu Daahiriyo quluubtooda, waxayna Mudan adduunka Dulli Aakharana waxay mudan Cadaab wayn.

۞ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلرَّسُولُ لَا يَحْزُنكَ ٱلَّذِينَ
يُسَـٰرِعُونَ فِى ٱلْكُفْرِ مِنَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا
بِأَفْوَٰهِهِمْ وَلَمْ تُؤْمِن قُلُوبُهُمْ ۛ وَمِنَ ٱلَّذِينَ
هَادُوا۟ ۛ سَمَّـٰعُونَ لِلْكَذِبِ
سَمَّـٰعُونَ لِقَوْمٍ ءَاخَرِينَ لَمْ يَأْتُوكَ ۖ يُحَرِّفُونَ
ٱلْكَلِمَ مِنۢ بَعْدِ مَوَاضِعِهِۦ ۖ يَقُولُونَ إِنْ
أُوتِيتُمْ هَـٰذَا فَخُذُوهُ وَإِن لَّمْ تُؤْتَوْهُ فَٱحْذَرُوا۟ ۚ
وَمَن يُرِدِ ٱللَّهُ فِتْنَتَهُۥ فَلَن تَمْلِكَ لَهُۥ مِنَ
ٱللَّهِ شَيْـًٔا ۚ أُو۟لَـٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَمْ يُرِدِ ٱللَّهُ أَن
يُطَهِّرَ قُلُوبَهُمْ ۚ لَهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا خِزْىٌ ۖ وَلَهُمْ
فِى ٱلْـَٔاخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٤١﴾

42. Waxay Maqli Ogyihiin Beenta waxayna Cunid Badanyihiin Xaaraanta, hadday kuu Yimaaddaana kala Xu-

سَمَّـٰعُونَ لِلْكَذِبِ أَكَّـٰلُونَ لِلسُّحْتِ ۚ
فَإِن جَآءُوكَ فَٱحْكُم بَيْنَهُمْ أَوْ أَعْرِضْ عَنْهُمْ ۖ

kun Dhexdooda ama ka Jeedsohaddaad kajeedsatana Wax kaama dhibaan haddaad kala xukuntana Caddaalad kukala xukun Eebe wuxuu jecelyahay caadiliintee.

وَإِن تُعْرِضْ عَنْهُمْ فَلَن يَضُرُّوكَ شَيْـًٔا
وَإِنْ حَكَمْتَ فَاحْكُم بَيْنَهُم بِالْقِسْطِ
إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ﴿٤٢﴾

43. Siday kuugu Xukuntami Iyadoo agtooda yahay Tawreed oo Xukunkii Eebe ku Yaal markaasna ay ka Jeedsan intaas ka Dib Kuwaasi ma aha Mu'Muniin.

وَكَيْفَ يُحَكِّمُونَكَ وَعِندَهُمُ التَّوْرَىٰةُ فِيهَا حُكْمُ
اللَّهِ ثُمَّ يَتَوَلَّوْنَ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ
وَمَآ أُو۟لَٰٓئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٣﴾

**Aayadahanu waxay ku soo Degeen kuwa ku Dagdaga Gaalnimada oo ka Baxa Daacadda Eebe iyo Rasuulkiisa, oo ka Hormariya Hawadooda iyo Ra'yigooda Shareecadda Eebe, waana Munaafiqiinta Colka Eebe ah, waxaa kale oo Iyana Colka Eebe ah, kuwa Yuhuudda ah ee Beenta maqla Dhexdoodana wax isu Sheega, Xaqana Leexiya, Siday u Leexiyeen, ee Qalloocana isfara inay Haystaan, wax kalana ayan maqlin, waana kuwa Eebe Ibtileeyey, wax xagga Eebe wax uga Tarina ma Jiraan, Dulli iyo Cadaabayna Mudan Aakharo iyo Adduunba, Been maqalkana waxay ku Darsadeen Cunidda Xaaraanta iyo Boolida, wuxuuna u Khiyaar galiyey inuu iskaga Jeedsado hadday u Yimaaddaan ama Caddaalad ku kala Xukumo, Xaqa oo la Qariyo, Beentoo la Faafiyo oo la maqlo iyo Xaaraanta oo la Cuno waa Caadada Yuhuudda iyo inta Raacda ama la Mid noqda Gaar ahaan waxay ku soo degeen Xaalka Zinada iyo Magdhawga Dilka, oy ka Been sheegeen, waxaase Waajiba in laga Leexdo Jidkooda.**
Al-Maa'idah (41-43).

---

44. Anagaa soo Dejinay Tawreed oo Dhexdeeda ku suganyahay Hanuun iyo Nuur, oyna ku xukumayeen Nabiyadii u Hogaansamay Eebe kuwii Yuhuudoobay, waxaana Xukumi Jiray madaxdii iyo Culimadii wixii laga Doonay inay ILaaliyaan oo Kitaabka Eebe ah, waxay ku ahaayeen Markhaati ee ha ka Cabsanina Dadka ee iga Cabsada ani, hana ku Gadanina Aayaadkayga Lacag (Qiimo) Yar, Ciddaan Xukumin wuxuu soo Dejiyey Eebe kuwaasi waa Gaalo uun.

إِنَّآ أَنزَلْنَا التَّوْرَىٰةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ يَحْكُمُ بِهَا
النَّبِيُّونَ الَّذِينَ أَسْلَمُوا لِلَّذِينَ هَادُوا
وَالرَّبَّٰنِيُّونَ وَالْأَحْبَارُ بِمَا اسْتُحْفِظُوا
مِن كِتَٰبِ اللَّهِ وَكَانُوا عَلَيْهِ شُهَدَآءَ فَلَا
تَخْشَوُا النَّاسَ وَاخْشَوْنِ وَلَا تَشْتَرُوا
بِـَٔايَٰتِي ثَمَنًا قَلِيلًا وَمَن لَّمْ يَحْكُم بِمَآ أَنزَلَ اللَّهُ
فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ الْكَٰفِرُونَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaan ku Faralyeelay korkooda in Nafta (Loo qisaaso) Nafta, ishana Isha, Sankana Sanka, Dhagtana Dhagta, ILigana ILiga, Nabaradana waa laysu Qisaasi, Ciddii iska Sadaqaysata (Saamaxda) waxay u Noqon Kafaaro (Dambi Dhaaf) Cidaanse Xukumin

وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَآ أَنَّ النَّفْسَ بِالنَّفْسِ
وَالْعَيْنَ بِالْعَيْنِ وَالْأَنفَ بِالْأَنفِ
وَالْأُذُنَ بِالْأُذُنِ وَالسِّنَّ بِالسِّنِّ وَالْجُرُوحَ
قِصَاصٌ فَمَن تَصَدَّقَ بِهِۦ فَهُوَ كَفَّارَةٌ

wuxuu soo Dejiyey Eebe kuwaasi waa Daalimiin uun.

لَهُۥ ۚ وَمَن لَّمْ يَحْكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُو۟لَٰٓئِكَ
هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٤٥﴾

**Tawreed wuxuu ahaa Kitaab Eebe oo Xaq ah oos Nabi Muuse ku soo Dejiyey, ka Dibse Yuhuuddu Leexisay waxaana ku Yiil hanuun iyo Nuur, waxaana Xukumi Jiray Nabiyadii Eebe u Hogaansamay iyo Culimadii iyo Madaxdii wax kasaysay, waxaana la faray inay Dhawraan Maragna ka ahaadaan, oyna ku Gadanin Aayaadka Eebe wax Nacfi ah, Ciddaan Xukumin waxa Eebe soo Dejiyeyna waa mid Gaaloobay.**
**Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Ciddii Diida waxa Eebe soo Dejiyey wuu Gaaloobay. Aayadda kalana waxay ka warrami Qisaasta iyo in Cid walba laga Gudan waxay gaysato, ama Naf ama Xubin, Taasina waxay ku Tusin Caddaaladda Islaamka iyo in Sharciga Eebe u Simanyahay Dadku, Ciddii iyadu iska Cafida Xaqbay u Leedahay Ajirna way ka Heli, Ciddaan saas Xukuminna waa mid Daalimiin ah. Aayadduna waa arrin Guud oo Cid walba Ku Rumoobi, waxayna Caddayn in Dadka Rag iyo Haween lagu Qisaasi, waxaana Sugnaaday in Ragga Haweenka loo Qisaasi. waana taa Caddaaladda Islaamka Ciddii ku Dhaqmi. Al-Maa'idah (44-45).**

---

46. Waxaana Raacsiinay Raadkoodii ciise Ibnu Maryama Isagoo Rumayn, wixii Hortiisa ahaa oo Tawreeda, waxaana Siinay Injiil oo Hanuun iyo Nuur ku Suganyahay, una Rumayn wixii ka Horeeyey oo Tawreeda Hanuun iyo Waanana u ah kuwa Dhawrsada.

وَقَفَّيْنَا عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِم بِعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ
يَدَيْهِ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ ۖ وَءَاتَيْنَٰهُ ٱلْإِنجِيلَ فِيهِ هُدًى
وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ وَهُدًى
وَمَوْعِظَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٦﴾

47. Ha Xukumeen Ehelka Injiil wuxuu ku soo Dejiyey Eebe Dhexdiisa, Cidaan Xukumin wuxuu Soo Dejiyey Eebe waa Mid Faasiq ah uun.

وَلْيَحْكُمْ أَهْلُ ٱلْإِنجِيلِ بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فِيهِ ۚ وَمَن لَّمْ
يَحْكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُو۟لَٰٓئِكَ
هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٤٧﴾

48. Waxaana kugu Soo Dejiyey Kitaabka Xaqa Isagoo Rumayn wixii ka Horeeyey oo Kitaab ah, Isagoo Marag iyo ILaaliye u ah, ee Ku kala Xukun Dhexdooda wuxuu Soo Dejiyey Eebe hana ka Raacin Hawadooda waxa kuu Yimid oo Xaq ah, Dhammaan waxaan u Yeellay Shareeco iyo Waddo, hadduu Doono Eebana wuxuu idinka Yeeli Umad kaliya, Laakiin wuu idinku Imtixaami wuxuu idin Siiyey ee u Tartama

وَأَنزَلْنَآ إِلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ بِٱلْحَقِّ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ
يَدَيْهِ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ ۖ فَٱحْكُم
بَيْنَهُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ ۖ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَآءَهُمْ عَمَّا
جَآءَكَ مِنَ ٱلْحَقِّ ۚ لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنكُمْ شِرْعَةً
وَمِنْهَاجًا ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً
وَلَٰكِن لِّيَبْلُوَكُمْ فِى مَآ ءَاتَىٰكُمْ ۖ فَٱسْتَبِقُوا۟

Khayrka, Xagga Eebe yey Noqoshadiinu tahay Dhammaan wuxuuna idiinka Warrami waxaad isku Diidanaydeen.

ٱلۡخَيۡرَٰتِۚ إِلَى ٱللَّهِ مَرۡجِعُكُمۡ جَمِيعٗا
فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ فِيهِ تَخۡتَلِفُونَ ﴿٤٨﴾

Waxaa ka Dambeeyey Tawreed Nabi Ciise oo Injiil lagu soo Dejiyey isagoo Hanuun ah u Rumaynna Tawreed, waxaana la faray Injiil Ehelkeedii inay Xukumaan waxa Eebe soo Dejiyey ILLeen Ciddaan Xukumin waxa Eebe soo Dejiyey waa uun Faasiqe.
Markaasaa Quraanka Sharafta leh Eebe ku soo Dejiyey Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Isagoo Marag iyo Ilaaliye u ah Kutubtii hore, waana in lagu Dhaqmo, oon hawada laga Dooranin, Umad Kasta wuuxuu Eebe u Yeelay Sharci iyo Waddo, hadduu Doonana wuxuu ka Yeeli lahaa umad Qudha, Laakiin inuu ku Imtixaamo wuxuu Siiyey, waana in Wanaagga loo Tartamo ILLeen Eebaa loo Noqone.
Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Annagu haddaan nahay Nabiyada waxaan nahay Walaalo Diintanaduna waa Mid. Al-Maa'idah (46-48).

---

49. Ku kala Xukun Dhexdooda wuxuu soo Dejiyey Eebe, hana Raacin Hawadooda, kana Digtoonow inay kaa Fidmeeyaan waxa Eebe kugu soo Dejiyey qaarkiis, hadday Jeedsadaanna Ogow in Eebe la Doonayo inuu ku Assiibo (Ciqaabo) Dambigooda Qaarkiis, wax badan oo Dadka ka mid ahna waa Faasiqiin.

وَأَنِ ٱحۡكُم بَيۡنَهُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ وَلَا تَتَّبِعۡ أَهۡوَآءَهُمۡ
وَٱحۡذَرۡهُمۡ أَن يَفۡتِنُوكَ عَنۢ بَعۡضِ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ
إِلَيۡكَۖ فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَٱعۡلَمۡ أَنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُصِيبَهُم بِبَعۡضِ
ذُنُوبِهِمۡۗ وَإِنَّ كَثِيرٗا مِّنَ ٱلنَّاسِ لَفَٰسِقُونَ ﴿٤٩﴾

50. Ma Xukunka Jaahilayad yey doonayaan, yaa uga Fiican Eebe Xukunkiisa qoomka wax Yaqiinsan (Rumaysan).

أَفَحُكۡمَ ٱلۡجَٰهِلِيَّةِ يَبۡغُونَۚ وَمَنۡ أَحۡسَنُ مِنَ ٱللَّهِ
حُكۡمٗا لِّقَوۡمٖ يُوقِنُونَ ﴿٥٠﴾

wuxuu Eebe Faray Nabiga Umaddiisuna waa la mide inuu ku kala Xukumo Dadka Quraanka Eebe soo Dejiyey, uusanna Raacin waxay Gaaladu Jeceshahay, kana Digtoonaado inay ka LeexiyaanXaqa, hadday Xaqa ka Jeedsanna waxaa u Sabab ah Dambigooda oo Eebe u qabtay Dadka wax badan oo ka mid ahna waa Faasiqiin, mana haboona in Xukun Jaahili ah laga Doorto Xukunka iyo Sharciga Eebe ee Wanaagsan.
Ibnu Kathiir wuxuu Yidhi: Eebe wuxuu ku diidi oo Canaanan kuwa ka Leexda Xukunka Eebe ee Kulmiyey khayr oo Dhan, kana Reeba Xumaan oo Dhan, oo uga leexday wax ka soo Hadhay oo ra'yi iyo Hawo iyo Nadaamyo ay Sameeyeen Dad iyagoon Daliil Shareecada Eebe ka haysan, Ciddii saas fasha waa in lala Dagaallamo intuu uga noqdo Xukunka Eebe iyo Rasuulkiisa, uusanna Xukumin wax ka soo Hadhay wax yar iyo wax wayn midna.
Xasan Basrina wuxuu Yidhi: Ciddii Xukunta Xukunka Eebe waxaan ahayn, waa Xukun Jaahili ah. waa na kaas Sharciga Eebe iyo Diintiisii waxaana Dhab ah Ciddii ku Dhaqantana inay Heli Nabadgalyo, Caddaalad, Barwaaqo iyo Wanaag, Tii ka leexatana ay la Kulmi Halaag, qas, caddaalad darro, Khilaaf, Nabadgalyo La'aan iyo Dhib oo Dhan, Sida Muuqata, waxaase lala Hadli Ciddii Caqli leh.
Al-Maa'idah (49-50).

---

51. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha ka yeelanina Yuhuud iyo Nasaara Sokeeye,

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ ٱلۡيَهُودَ وَٱلنَّصَٰرَىٰٓ

Qaarkood waa Sokeeyaha Qaarka (Kale) Ciddii ka Sokeeya Yeelata oo idinka Mid ah wuxuue ka midyahay Iyaga, Eebe ma Hanuuniyo Qoomka Daalimiinta ah.

أَوْلِيَآءَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنكُمْ فَإِنَّهُۥ
مِنْهُمْ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٥١﴾

52. Waxaad Arkaysaan kuwa Qalbiga ka Buka (Munaafiqiinta) oo u Degdagi Dhexdooda, iyagoo Dhihi waxaannu ka Cabsan inay nagu dhacdo Dhibaato (Socota) waxay u Dhawdahay in Eebe keeno Fatxi (Gargaar) Xagiisa ah oo Markaas ay ahaadaan kuwo waxay u Qarsanayeen Naftooda (oo Gaal jacayl ah) Qoomameeya.

فَتَرَى ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ يُسَٰرِعُونَ فِيهِمْ
يَقُولُونَ نَخْشَىٰٓ أَن تُصِيبَنَا دَآئِرَةٌ فَعَسَى ٱللَّهُ أَن يَأْتِىَ
بِٱلْفَتْحِ أَوْ أَمْرٍ مِّنْ عِندِهِۦ فَيُصْبِحُوا۟ عَلَىٰ مَآ أَسَرُّوا۟
فِىٓ أَنفُسِهِمْ نَٰدِمِينَ ﴿٥٢﴾

53. Waxay Odhan kuwii Rumeeyey (Xaqa) ma kuwaasaa Kuwii ku Dhaartay Eebe Dhaar Adag inay idinla Jiraan, waxaa Hoobtay Camalkoodii waxayna ahaadeen kuwo Khasaaray.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَهَٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ أَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ
جَهْدَ أَيْمَٰنِهِمْ إِنَّهُمْ لَمَعَكُمْ حَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ
فَأَصْبَحُوا۟ خَٰسِرِينَ ﴿٥٣﴾

Wuxuu Eebe Sarreeye ka Reebayaa kuwa xaqa Rumeeyey inay Sokeeye ka Yeeshaan Yuhuud iyo Nasaara ee ah Col Islaamka iyo Dadkiisa, ILLeen qaarkood qaarka kale Sokeeyuu u Yahaye, Ciddii Xadhiidh Sokeeye la Yeelatana Iyaguu ka mid yahay, Eebana ma Hanuuniyo qoom daalimiina, waxaana jira in kuwa Munaafiqiinta ah ee qalbiga ka Buka u Degdagaan Xidhiidhintooda iyagoo Sheegi inay ka Cabsan in Dhib ku Dhaco, waxayse u Dhawdahay in Gargaarka Eebe Yimaado oo Markaas qoomameeyaan Xumaantay Qarsanayeen, waxayna odhan kuwa Xaqa Rumeeyey ma Kuwaasaa kuwii Dhaarta Adag Eebe ku Dhaartay inay idinla Jiraan, Camalkoodu wuu buray wayna Khasaareen.
Aayaduhuna waxay Wareemi kuwaan Noolaan karin Xidhiidh Gaalo La'aanteed, waana Doqonimo inaad Colkaa Saaxiib ka Dhigato, Yaase wax Maqashiin Dadka dhumay. Al-Maa'idah (51-53).

---

54. Kuwa Xaqa Rumeeyow Ruuxii ka Ridooba Diintiisa oo idinka mid ah, wuxuu Eebe keeni qoom uu Jecelyahay iyana Jecel una naxariista Mu'miniinta kuna Daran Gaalada, kuna Jahaadi Jidka Eebe oon ka Cabsanayn Canaanta Canaante, Taasina waa Fadliga Eebe wuxuuna Siiyaa Cidduu Doono, Eebana waa Deeq Badane Og.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَن يَرْتَدَّ مِنكُمْ عَن دِينِهِۦ فَسَوْفَ
يَأْتِى ٱللَّهُ بِقَوْمٍ يُحِبُّهُمْ وَيُحِبُّونَهُۥٓ أَذِلَّةٍ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ
أَعِزَّةٍ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ يُجَٰهِدُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَلَا
يَخَافُونَ لَوْمَةَ لَآئِمٍ ذَٰلِكَ فَضْلُ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ
وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٥٤﴾

55. Waligiinnu waa uun Eebe iyo Rasuulkiisa iyo kuwa Rumeeyey (Xaqa) ee Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Rukuuca.

إِنَّمَا وَلِيُّكُمُ ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ
ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُمْ رَٰكِعُونَ ﴿٥٥﴾

56. Ciddii ka Waliyeelata Eebe iyo Rasuulkiisa iyo Kuwa Rumeeyey Xaqa Xisbiga ILaahay Umbaa Adkaan.

وَمَن يَتَوَلَّ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فَإِنَّ حِزْبَ ٱللَّهِ
هُمُ ٱلْغَٰلِبُونَ ٥٦

ILaahay wuxuu Inoo Sheegi Ciddii ka Jeedsata Gargaarka Diintiisa iyo Fulinta Sharcigiisa inuu Eebe ku Badali mid ka Khayr roon, kana Xoog Badan kana Toosan, oo ku Jahaadi Jidka Eebe, kana Cabsanayn Dagaalid, ILLeen Eebaa Fadligiisu waasac yahaye, Mu'miniintana Eebaa u Wali ah, iyo Rasuulkiisa iyo Kuwa Xaqa Rumeeyey, ee Tukada, Zakadana Bixiya, Ciddii ka Wali Yeelata ILaahay Rasuulkiisa iyo Kuwa Xaqa Rumeeyeyna wuu Guulaysan, ILeen Xisbiga Eebe Umbaa adkaadee, Aayaduhuna waxay Ishaari in Ciddii Gaalawda Eebe ka Kaaftoomi, kuna Badali mid ka Fiican, Tan kale waa inaan Xaqa looga leexan loogana Aamusin Dagaalidda.
Imaam Axmed Waxaa laga Wariyey: in Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Yidhi: Yuuna ka Reebin Midkiin Cabsida Dadka Eebe Korkiisa Inuu Xaqa Sheego, ILeen ma soo Dhaweeyo Ajal, Mana Fogeeyo Risqi in Xaqa la sheego, ama loo Sheegi mid Wayn. Al-Maa'idah (54-56).

---

57. Kuwa xaqa Reemeyow ha ka Yeelanina kuwa ka Yeeshay Diinta Jees Jees iyo Ciyaar oo ah kuwa Ehelu Kitaabka ah Idinkana Horeeyey iyo Gaalada sokeeye, kana Dhawrasada Eebe haddaad Tihiin Mu'miniin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّخِذُوا۟ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ دِينَكُمْ هُزُوًا
وَلَعِبًا مِّنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِكُمْ وَٱلْكُفَّارَ
أَوْلِيَآءَ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ٥٧

58. Markaad ugu Dhawaaqdaan Salaaddana waxay ka Yeeshaan Jees Jees iyo Ciyaar, waxaana Arrintaas ugu Wacan inay Yihiin Qoomaan waxkasayn.

وَإِذَا نَادَيْتُمْ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ ٱتَّخَذُوهَا هُزُوًا وَلَعِبًا ۚ ذَٰلِكَ
بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَعْقِلُونَ ٥٨

59. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow Miyaad Noogu Cadhoonaysaan inaan Rumaynay Eebe iyo waxa naloo soo Dejiyey iyo wixii la Dajiyey horay Mooyee, Badankiinnu waa Faasiqiin.

قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ هَلْ تَنقِمُونَ مِنَّآ إِلَّآ أَنْ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ
وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْنَا وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلُ وَأَنَّ أَكْثَرَكُمْ فَٰسِقُونَ ٥٩

60. Waxaad Dhahdaa maydinka warramaa waxa ka Sharbadan Arrintaas abaal Marinta Eebe Agtiisa waa mid Eebe Nacladay una Cadhooday kana Yeelay Daanyeerro, Doofaarro iyo Shaydaan Caabude, Kuwaasay Shar badantahay Meejoodu kana Dhumid Badan Jidka Toosan.

قُلْ هَلْ أُنَبِّئُكُم بِشَرٍّ مِّن ذَٰلِكَ مَثُوبَةً عِندَ ٱللَّهِ ۚ مَن لَّعَنَهُ
ٱللَّهُ وَغَضِبَ عَلَيْهِ وَجَعَلَ مِنْهُمُ ٱلْقِرَدَةَ وَٱلْخَنَازِيرَ
وَعَبَدَ ٱلطَّٰغُوتَ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ شَرٌّ مَّكَانًا وَأَضَلُّ عَن سَوَآءِ
ٱلسَّبِيلِ ٦٠

Wax badan Yuu Quraanku ka Digay Sokeeye ka Yeelashada Gaalada ka Yeelan Diinta Eebe Jees Jees iyo Ciyaar, ama ha ahaado Ehelu Kitaab ama Gaala Kalee, Sidoo kale waxay ku Jees Jeesaan Aadaanka Salaadda ILeen waa kuwo aan wax kasayne, waxay Muslimiinta ku Nici oon xaqay Rumeeyeen ahaynna ma jiro, waxaana U Xun wax la arko Cid Eebe Lacnaday, oo u Cadhooday, oo ka Yeelay Daanyeer, Doofaar iyo Sheydaan Caabud, waxaana jirta arrin Dhab ah oo quraanku ku Cel-celiyo oo ah in Gaalo tahay Colka Eebe, Nabiga, Diinta Islaamka ah, Muslimiinta iyo Xaqa Toosanba, waana in laga Digtoonaado lagana Feejignaado. Al-Maa'idah (57-60).

61. Hadday idiin Yimaaddaan waxay Dhahaan waan Rumaynay (Xaqa) iyagoo la soo Galay Gaalnimo,lana Baxay, Eebana waa Ogyahay waxay Qarin,

وَإِذَا جَآءُوكُمْ قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا وَقَد دَّخَلُوا۟ بِٱلْكُفْرِ وَهُمْ
قَدْ خَرَجُوا۟ بِهِۦ ۚ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا كَانُوا۟ يَكْتُمُونَ ﴿٦١﴾

62. Waxaad Arkaysaa wax Badan oo ka mid ah oo u degdegi dambiga iyo Colnimada iyo cunidda Xaaraanta, waxaa Xumaan badan waxay Fali.

وَتَرَىٰ كَثِيرًا مِّنْهُمْ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْإِثْمِ وَٱلْعُدْوَٰنِ
وَأَكْلِهِمُ ٱلسُّحْتَ ۚ لَبِئْسَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٦٢﴾

63. May ka Reebaan Ikhyaartu iyo culimadu hadalkooda dambiga ah iyo Cunidda Xaaraanta, waxaa Xumaan badan waxay Samayn.

لَوْلَا يَنْهَىٰهُمُ ٱلرَّبَّٰنِيُّونَ وَٱلْأَحْبَارُ عَن قَوْلِهِمُ
ٱلْإِثْمَ وَأَكْلِهِمُ ٱلسُّحْتَ ۚ لَبِئْسَ مَا كَانُوا۟
يَصْنَعُونَ ﴿٦٣﴾

64. Waxay Tidhi Yuhuuddu Gacanta Eebe waa Laabantahay, ha lallaabo Gacmahoodu hana La naclado hadalkay Dheheen Dartiis, saas ma aha ee waxay ku Fidsanyihiin Khayrka (Deeq badane) wuxuuna u Nafaqeeyaa Siduu Doono, wuxuuna u Kordhin wax badan oo iyaga ka mid ah waxa lagaaga soo Dejiyey Eebahaa Xad Gudub iyo Gaalnimo, waxaana ku Dhex tuuray Col iyo Cadho tan iyo Qiyaame, mar kastooy huriyaan dab Dagaalna waxaa bakhtiiya Eebe, waxayna la Socdaan Dhulka Fasaad, ILaahayna ma Jecla kuwa wax Fasaadiya.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ يَدُ ٱللَّهِ مَغْلُولَةٌ ۚ غُلَّتْ أَيْدِيهِمْ وَلُعِنُوا۟
بِمَا قَالُوا۟ ۘ بَلْ يَدَاهُ مَبْسُوطَتَانِ يُنفِقُ كَيْفَ يَشَآءُ ۚ
وَلَيَزِيدَنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم مَّآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ طُغْيَٰنًا
وَكُفْرًا ۚ وَأَلْقَيْنَا بَيْنَهُمُ ٱلْعَدَٰوَةَ وَٱلْبَغْضَآءَ إِلَىٰ يَوْمِ
ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ كُلَّمَآ أَوْقَدُوا۟ نَارًا لِّلْحَرْبِ أَطْفَأَهَا ٱللَّهُ ۚ
وَيَسْعَوْنَ فِى ٱلْأَرْضِ فَسَادًا ۚ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ
ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٦٤﴾

Munaafiqiintu meelay Joogaanba kama tagaan Gaalnimo iyo Xumaan, Eebana waa Ogyahay waxay qarin, waxaadna ku aragtaa inay u deg degi dambiga, Colnimada iyo Xaaraan Cunka, wax Xunbayna Falaan, Culimadaan ka reebin waxaasna waxay Sameeyeen wax Xumaan badan.
Yuhuudna Lacnadi ha ku Dhacdee waxay Af-Xumeeyeen Ilaaheen Sarreeye, kuna Sheegeen Bakhaylnimo, Iyagaase Bakhayllo ah lana Lacnaday ee Eebe waa Deeqsi Siduu Rabo wax u Bixiya, waxayna ka qaadi Xaqa Xad Gudub, Gaalnimo, Col Dhexdooda ah, Cadho Tan iyo Qiyaamada, Dabkay Huriyaanna Eebaa Bakhtiin, Dhulkana way Fasaadiyaan Eebana ma jecla kuwa wax Fasaadiya. Al-Maa'idah (61-64).

---

65. Hadday Ehelu Kitaabku Rumeeyaan xaqa oy Dhawrsadaan waxaan ka Asturi lahayn Xagooda Xumaantooda waxaana Galinlahayn Jannada Naciimo.

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ ءَامَنُوا۟ وَٱتَّقَوْا۟
لَكَفَّرْنَا عَنْهُمْ سَيِّـَٔاتِهِمْ وَلَأَدْخَلْنَٰهُمْ جَنَّٰتِ
ٱلنَّعِيمِ ﴿٦٥﴾

66. Hadday ku Camal falaan Tawreed, Injiil, iyo waxa looga soo Dejiyey Xagga Eebahoodna waxay ka Cuni lahaayeen Korkooda iyo Hoostooda, «barwaaqo» waxaa ka mid ah Umad Dhex dhexaysa wax badan oo ka mid ahna waxaa Xun Waxay Fali.

وَلَوْ أَنَّهُمْ أَقَامُوا۟ ٱلتَّوْرَىٰةَ وَٱلْإِنجِيلَ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْهِم
مِّن رَّبِّهِمْ لَأَكَلُوا۟ مِن فَوْقِهِمْ وَمِن تَحْتِ
أَرْجُلِهِم مِّنْهُمْ أُمَّةٌ مُّقْتَصِدَةٌ وَكَثِيرٌ مِّنْهُمْ
سَآءَ مَا يَعْمَلُونَ ﴿٦٦﴾

67. Rasuulow Gaadhsii waxa lagaaga soo Dejiyey Eebahaa (Dadka) Haddaadan Falin Maadan Gaadhsiin Risaaladiisa «Fariintiisa», Eebaana kaa Ilaalin Dadka, Eebana ma hanuuniyo qoom Gaala ah.

۞ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلرَّسُولُ بَلِّغْ مَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ
وَإِن لَّمْ تَفْعَلْ فَمَا بَلَّغْتَ رِسَالَتَهُۥ وَٱللَّهُ يَعْصِمُكَ
مِنَ ٱلنَّاسِ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْكَـٰفِرِينَ ﴿٦٧﴾

Kutubta Eebe soo Dejiyey waa Xaq Haddaan la Leexin, saas Darteed hadday ku Camal fali Lahaayeen Ehelu Kitaabku waxaa la Dhaafi lahaa Dambigooda, waana la Jannayni lahaa, waxayna Heli Lahaayeen Barwaaqo, waxaase laga helaa Cid Dhex dhexaysa, wax badan baase Xumaan Fala, Eebana wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Gaadhsiiyo dadka waxa Eebe ku soo Dejiyey, Hadduusan Saas falinna wax Ma Gaadhsiin, Dadkana Eebaa Ka Dhawri mana Hanuuniyo Gaalada.
Caa'isha waxay Tidhi: Hadduu Nabigu Qarin waxa loo wax-yooday wuxuu qarin lahaa Aayaddan.
Nabiguna Maalinta Xajkii waynaa wuxuu Warsaday Asaxaabta inuu Gaadhsiiyey Xaqa iyo in Kale waxayna sheegeen inuu Gaadhsiiyey, Markaasuu Farta Cirka u Taagay oo Yidhi oo ku Soo Cel Celiyey oo Yidhi Eebow sow ma Gaadhsiin. Al-Maa'idah (65-67).

---

68. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow waxba ma Tihidiin intaad ka Oogtaan Tawreed, Injiil iyo waxa Laydiinka soo Dejiyey Xagga Eebihiin (Quraanka) wuxuuna u Kordhin wax badan oo ka mid ah waxa Xagga Eebahaa lagaaga soo Dejiyey Xad Gudub iyo Gaalnimo ee haw murugoon qoomka gaalada ah.

قُلْ يَـٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَـٰبِ لَسْتُمْ عَلَىٰ شَىْءٍ حَتَّىٰ تُقِيمُوا۟
ٱلتَّوْرَىٰةَ وَٱلْإِنجِيلَ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْكُم مِّن رَّبِّكُمْ
وَلَيَزِيدَنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم مَّآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ
طُغْيَـٰنًا وَكُفْرًا فَلَا تَأْسَ عَلَى ٱلْقَوْمِ ٱلْكَـٰفِرِينَ ﴿٦٨﴾

69. Kuwa Xaqa Rumeeyey iyo kuwa Yuhuudoobay iyo Saabi'iinta iyo Nasaara Ciddii Rumeysa Eebe, Maalinta Dambe (Qiyaamada) oo fala camal fiican cabsi korkooda ma ahaato iyo Walbahaar (Midna).

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱلَّذِينَ هَادُوا۟ وَٱلصَّـٰبِـُٔونَ
وَٱلنَّصَـٰرَىٰ مَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ وَعَمِلَ
صَـٰلِحًا فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٩﴾

70. Waxaan Qaadnay Ballanka Banii'israa'iil waxaana u Diray Xaggooda Rasuullo, Markastoos ula Yimaaddo Rasuul waxaan Naftoodu Jeclayn Koox way Beeniyaan Kooxna way Dilaan.

لَقَدْ أَخَذْنَا مِيثَـٰقَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ وَأَرْسَلْنَآ
إِلَيْهِمْ رُسُلًا كُلَّمَا جَآءَهُمْ رَسُولٌۢ بِمَا لَا تَهْوَىٰٓ
أَنفُسُهُمْ فَرِيقًا كَذَّبُوا۟ وَفَرِيقًا يَقْتُلُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxayna u Maleeyeen inaan Fidmo Jirin, wayna Indho Beeleen oo Dhago Beeleen, Markaasuu Eebe ka Toobad Aqbalay, markaasay Indho Beeleen oo Dhago Beeleen wax badan oo ka mid ah Eebana waa Arkaa waxay Fali.

وَحَسِبُوٓا۟ أَلَّا تَكُونَ فِتْنَةٌ فَعَمُوا۟ وَصَمُّوا۟ ثُمَّ
تَابَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ ثُمَّ عَمُوا۟ وَصَمُّوا۟ كَثِيرٌ
مِّنْهُمْ ۚ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿٧١﴾

Ehelu Kitaab waxba ma aha intay kaga Socdaan waxay Tawreed, Injiil iyo Quraanka fari, wax badan oo ka mid ahna way Xad-gudbaan oo Gaaloobaan markay quraanka Maqlaan, Ciddii Eebe Rumeysa iyo Qiyaame oo Camal Fiican fasha oo Waafaqsan Shareecada Islaamka Cabsi iyo Murug midna ma Hayso, reer Banii Israa'iil wuxuu Eebe Ballan kaga qaaday inay xaqa Rumeeyaan,wayse Buriyeen oy Rasuullada qaar Beeniyaan qaarna Dilaan, iyagoon Dhib u Arkayn, Waase kuwo Indho iyo Dhaga la', waana arkaa Eebe waxay fali Aayaduhuna waxay Caddayn in Dadku Qiimo ku leeyahay Raacidda iyo Ku Dhaqanka xaqa, haddii kale waxba ma aha, wax qiima ahna ma laha. Al-Maa'idah (68-71).

---

72. waxaa Gaaloobay kuwa Yidhi Eebe waa Masiixi Ibnu Maryama, Wuxuuna Yidhi Masiix (Ciise) Banii Israa'iilow Caabuda Eebe ee ah Eebahay iyo Eebihiin, Ruuxii u Shariig Yeela Eebe (La wadaajiya) wuxuu Eebe ka Xarrimay Jannada wuxuuna ku hoyan Naarta Daalimna ma helo Gargaare.

لَقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓا۟ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ
ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَ ۖ وَقَالَ ٱلْمَسِيحُ يَٰبَنِىٓ
إِسْرَٰٓءِيلَ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ رَبِّى وَرَبَّكُمْ ۖ إِنَّهُۥ مَن
يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ ٱلْجَنَّةَ وَمَأْوَىٰهُ
ٱلنَّارُ ۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنْ أَنصَارٍ ﴿٧٢﴾

73. Waxaa Gaaloobay kuwii Yidhi ILaahay waa Saddex Midkood, ILaah kaliya Mooyee ILaah kalana ma jiro, hadayna ka Joogin waxay Sheegina waxaa Taaban kuwa Gaaloobay oo ka mid ah Cadaab Daran.

لَّقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓا۟ إِنَّ ٱللَّهَ ثَالِثُ ثَلَٰثَةٍ
وَمَا مِنْ إِلَٰهٍ إِلَّآ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۚ وَإِن لَّمْ يَنتَهُوا۟ عَمَّا
يَقُولُونَ لَيَمَسَّنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنْهُمْ
عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

74. Miyeyna u Toobad keenayn Eebe oyna Dambi Dhaaf warsanayn, Eebaana Dambi Dhaafe Naxariista ah.

أَفَلَا يَتُوبُونَ إِلَى ٱللَّهِ وَيَسْتَغْفِرُونَهُۥ ۚ
وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٧٤﴾

75. Masiix (Ciise) Ibnu maryama ma aha waxaan Rasuul ahayn, waxaana tagay hortiis rasuuladii, hooyadiisna waxay ahayd rumayso, waxayna cuni

مَّا ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ
مِن قَبْلِهِ ٱلرُّسُلُ وَأُمُّهُۥ صِدِّيقَةٌ ۖ كَانَا
يَأْكُلَانِ ٱلطَّعَامَ ۗ ٱنظُرْ كَيْفَ نُبَيِّنُ

jireen Cunnada, day Saannu ugu Caddayn Aayaadka Markaas day Sida loo iilo.

لَهُمُ ٱلۡأٓيَٰتِ ثُمَّ ٱنظُرۡ أَنَّىٰ يُؤۡفَكُونَ ٧٥

Aayadahanu waxay Caddayn Siday Nasaaro u Gaaloowday, oo ah inay Nabi Ciise ILaah ku Sheegeen, oy Dheheen waa ILaah Saddaxaad, Isagooy Dhabtu tahay inuu ILaah kaliya yahay wax la Wadaaga Ilaahnimada Jirin, Ciddii wax laWadaajisana Janno ka Dheertahay, Naarna uu Gali, Nabi Ciisana yahay Addoon Eebe oo Rasuul ah Sidii Rasuuladii Hore, Hooyadiina Runlay Tahay ooyna ahaayeen kuwo wax Cuna, Balse day sida xaqa loogu Caddeeyey iyo Siday U dhumi. Saas darteed yey Doqonimo tahay in Eebe la Diido ama ILaah kale la Sheego, Wanaag, Sharaf, iyo Jannona waxaa Mudan Muslimka Toosan Siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) u Yidhi: Ma galo Jannada Ruuxaan Muslim ahayn. Al-Maa'idah (72-75).

---

76. Waxaad Dhahdaa ma waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow waxaan Hananin Dhib iyo Dheef (midna) Eebana Yahay Maqle Oge ah.

قُلۡ أَتَعۡبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَمۡلِكُ
لَكُمۡ ضَرّٗا وَلَا نَفۡعٗاۚ وَٱللَّهُ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ ٧٦

77. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow ha ku Xadgudbina Diintiinna si aan Xaq ahayn, hana Raacina hawada qoom Dhumay mar hore Dhumiyeynna wax badan kana Dhumay Jidka Toosan.

قُلۡ يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ لَا تَغۡلُواْ فِي دِينِكُمۡ
غَيۡرَ ٱلۡحَقِّ وَلَا تَتَّبِعُوٓاْ أَهۡوَآءَ قَوۡمٖ قَدۡ
ضَلُّواْ مِن قَبۡلُ وَأَضَلُّواْ كَثِيرٗا وَضَلُّواْ
عَن سَوَآءِ ٱلسَّبِيلِ ٧٧

78. Waa lagu Lacnaday Kuwii Gaaloobay oo Banii Israa'iil ah Carrabka Daa'wuudd iyo Ciise Ibnu Maryama Arrintaasna waxaa ugu Wacan Caasinimadooda ahaayeenna kuwo Xadgudba.

لُعِنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنۢ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ
عَلَىٰ لِسَانِ دَاوُۥدَ وَعِيسَى ٱبۡنِ مَرۡيَمَۚ
ذَٰلِكَ بِمَا عَصَواْ وَّكَانُواْ يَعۡتَدُونَ ٧٨

79. Waxayna ahaayeen kuwaan iska Reebayn Xumaan ay Falayaan, waxaa Xun waxay Falayeen.

كَانُواْ لَا يَتَنَاهَوۡنَ عَن مُّنكَرٖ
فَعَلُوهُۚ لَبِئۡسَ مَا كَانُواْ يَفۡعَلُونَ ٧٩

80. Waxaad Arkaysaan wax badan oo ka mid ah oo ka Sokeeye Dhigan kuwo Gaaloobay waxaa Xun waxay u Hormarsatay Naftoodu oo ah in Eebe u cadhooday, Cadaabkana ay ku Waari.

تَرَىٰ كَثِيرٗا مِّنۡهُمۡ يَتَوَلَّوۡنَ
ٱلَّذِينَ كَفَرُواْۚ لَبِئۡسَ مَا قَدَّمَتۡ لَهُمۡ أَنفُسُهُمۡ
أَن سَخِطَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِمۡ وَفِي ٱلۡعَذَابِ
هُمۡ خَٰلِدُونَ ٨٠

81. Hadday Yihiin kuwo Rumeyn Eebe iyo Nabiga iyo waxa lagu soo Dejiyey mayna Yeesheen Sokeeye Gaalo laakiin wax badan oo ka mid ah waa Faasiqiin.

وَلَوۡ كَانُواْ يُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلنَّبِيِّ
وَمَآ أُنزِلَ إِلَيۡهِ مَا ٱتَّخَذُوهُمۡ أَوۡلِيَآءَ وَلَٰكِنَّ
كَثِيرٗا مِّنۡهُمۡ فَٰسِقُونَ ٨١

Eebaa Cibaado Muta Awoodna leh, mana habboona in wax kale la Caabudo, Tan kale waa inaan lagu Xad-gudbin Diinta si aan Xaq ahayn oo Cidna la Siin xaqa Eebe siday Gaaladu Faleen, Kuwaasoo lagu Lacnaday Carrabkii Nabi Daawuud iyo Ciise Ibnu Maryama, ILLeen Xumaanta iskama Reebi jirine, waxaana jira kuwo Gaalada Sokeeye ka Dhigan, waase kuwo Eebe u Cadhooday oo ku waari Naarta, ILLeen hadday Eebe iyo Nabiga Dhab u Rumeeyaan kamayna Yeesheen Sokeeye, Laakiin wax badan oo ka mid ah waa Faasiqiin.
Rasuulkuna (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Fara Wanaagga oo Reeba Xumaanta ka hor intaydaan intaad ILaahay baridaan uusan idin Ajiibin.
Taasina waxay Muujin in wanaagga la faro Dadka Xumaantana laga Reebo, Jidka Gaaladana laga Fogaado. Al-Maa'idah (76-81).

---

82. Waxaad Ogaan kuwa Dadka u Daran Colnimada kuwa Rumeeyey (Xaqa) (Muslimiinta) Yuhuud iyo Mushrikiinta (Diin laawayaasha) waxaad Ogaan kuwa ugu soo Dhaw Jacayl kuwa Rumeeyey Xaqa (muslimiinta) inay yihiin kuwa dhihi waxaan nahay Nasaaro, Illeen waxaa ka mid ah qaysas iyo Raahibiin Ismana Kibriyaan.

۞ لَتَجِدَنَّ أَشَدَّ ٱلنَّاسِ عَدَٰوَةٗ لِّلَّذِينَ ءَامَنُواْ
ٱلۡيَهُودَ وَٱلَّذِينَ أَشۡرَكُواْۖ وَلَتَجِدَنَّ
أَقۡرَبَهُم مَّوَدَّةٗ لِّلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ
إِنَّا نَصَٰرَىٰۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّ مِنۡهُمۡ قِسِّيسِينَ
وَرُهۡبَانٗا وَأَنَّهُمۡ لَا يَسۡتَكۡبِرُونَ ٨٢

83. Markay maqlaan waxaa lagu soo Dejiyey Rasuulkana waxaad arkaysaa indhahoodoo Ilmo ka Daadan waxay aqoonsadeen oo xaqa ah iyagoo dhihi Eebow waan Rumeynay ee nagu dhig (Yeel) kuwa marag furi (Xaqa qiri).

وَإِذَا سَمِعُواْ مَآ أُنزِلَ إِلَى ٱلرَّسُولِ تَرَىٰٓ أَعۡيُنَهُمۡ
تَفِيضُ مِنَ ٱلدَّمۡعِ مِمَّا عَرَفُواْ مِنَ ٱلۡحَقِّۖ يَقُولُونَ
رَبَّنَآ ءَامَنَّا فَٱكۡتُبۡنَا مَعَ ٱلشَّٰهِدِينَ ٨٣

84. Maxaanaan u rumeynaynin Eebe iyo waxa noo yimid oo xaq ah oonaan u Damcaynin inuu na galiyo (naga yeelo) Ilaahanno qoomka Suuban la Jirkooda.

وَمَا لَنَا لَا نُؤۡمِنُ بِٱللَّهِ وَمَا جَآءَنَا مِنَ ٱلۡحَقِّ
وَنَطۡمَعُ أَن يُدۡخِلَنَا رَبُّنَا مَعَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلصَّٰلِحِينَ ٨٤

85. wuuna ku Abaal marin Eebe waxay Dhaheen Jannooyin oy Socoto Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda, Taasina waa Abaal marinta Samafalayaasha.

فَأَثَٰبَهُمُ ٱللَّهُ بِمَا قَالُواْ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا
ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَاۚ وَذَٰلِكَ جَزَآءُ
ٱلۡمُحۡسِنِينَ ٨٥

86. kuwa Gaaloobay oo Beeniyey Aayaadkanaga Kuwaasu Waa Jaxiimo Ehelkeeda.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَآ أُو۟لَـٰٓئِكَ
أَصْحَـٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿٨٦﴾

Ibnu Cabaas wuxuu Yidhi waxay ku soo Degtey Aayadahan Najaashi iyo Saaxiibadiis, Markuu Jacfar ku Akhriyey Quraanka, waxaase Muuqata had iyo Jeer Colnimada iyo Nacbaanta Yuhuud iyo diinlaawey-aashu u qabaan Xaqa iyo Diinta Islaamka. iyo Muslimiinta, hase Yeeshee hadday Nasaaradu ugu Dhaqmi Injiil si Dhab ah oo sugan waa inay Noqdaan Sida Aayaduhu Sheegeen oo ka Dhawraan Colka iyo waxyeellada Muslimiinta iyo Diinta Islaamka , Haddii Kale kuma Dhaqmaan Injiil ee waa Yuhuud ama Mulxidiin Diin-Laawayaal ah , kuwaasna waxaa Xaqa u Diiday Xasad , Isla wayni, Xumaan Jecayl iyo Inay Xoriyad u Helaan si ay uga Dharjiyaan Naftooda wax Kastoo Xumaana oy Doonaan.
Waxaana Sugnaatay Hadduu la kaliyoobo Yuhuudi Ruux Muslim ah wuxuu Doonaa inuu Dilo. Taasina way Muuqataa had iyo Jeer, Waase in laysku Duubnaado lagana Digtoonaado, lagana Hortago. Al-Maa'idah (82-86).

---

87. Kuwa xaqa Rumeeyow ha Xarrimina Wanaagga (Xalaasha) Eebe Idiin Banneeyey hana Xadgudbina, Eebe ma Jecla kuwa Xad gudbee.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تُحَرِّمُوا۟ طَيِّبَـٰتِ مَآ أَحَلَّ
ٱللَّهُ لَكُمْ وَلَا تَعْتَدُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْمُعْتَدِينَ ﴿٨٧﴾

88. Waxna ka Cuna Wuxuu Idinku Arzaaqay Eebe isagoo Xalaal Fiican ah kana Dhawrsada Eebe ee ah kaad Rumeysantihiin.

وَكُلُوا۟ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُ حَلَـٰلًا طَيِّبًا ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ
ٱلَّذِىٓ أَنتُم بِهِۦ مُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Eebe Idiin ma Qabto Dhaar DanLa'aaneed (Laqwi) Laakiin wuxuu idiin qaban Dhaartaad u Qasaddaan, Kafaaradeeduna waa Quudin Toban Miskiin (oo siisaan) kan u dhexeeya waxaad ku Quudisaan Ehelkiinna ama Arrad Bixintooda ama Xorayn qoor, Ciddaan Helinna waxay Soomi Saddex Maalmood, Taasaana ah Kafaarada Dhaartiinna Markaad Dhaarataan, ee dhawra dhaartiinna Saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayadkiisa, waxaadna Mudantihiin inaad ku Mahdisaan.

لَا يُؤَاخِذُكُمُ ٱللَّهُ بِٱللَّغْوِ فِىٓ أَيْمَـٰنِكُمْ وَلَـٰكِن
يُؤَاخِذُكُم بِمَا عَقَّدتُّمُ ٱلْأَيْمَـٰنَ ۖ فَكَفَّـٰرَتُهُۥٓ
إِطْعَامُ عَشَرَةِ مَسَـٰكِينَ مِنْ أَوْسَطِ مَا تُطْعِمُونَ
أَهْلِيكُمْ أَوْ كِسْوَتُهُمْ أَوْ تَحْرِيرُ رَقَبَةٍ ۖ فَمَن لَّمْ يَجِدْ
فَصِيَامُ ثَلَـٰثَةِ أَيَّامٍ ۚ ذَٰلِكَ كَفَّـٰرَةُ أَيْمَـٰنِكُمْ
إِذَا حَلَفْتُمْ ۚ وَٱحْفَظُوٓا۟ أَيْمَـٰنَكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ
ٱللَّهُ لَكُمْ ءَايَـٰتِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٨٩﴾

Ma Bannaana wax Eebe Baneeyey in la Xarrimo, ama lagu Xad-Gudbo, ILLeen Eebe ma Jecla kuwaas Xad-Gudbee, waana in Xalaasha Fiican la Cuno.
Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Waxay soo Degtay Mar Koox Asaxaabtii ah ay Damceen in Nolosha Adduunka Dhan ka Maraan, markaasuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Yidhi. Markii Loo Sheegay: Anigu Waan Soomi (Sunnaha) oon Marna Afuri, Marna waan Tukan (Sunnaha) marna waan Seexan, Haweenkana waan Guursan ee Ciddii Sunadayd (Wadadayda) qaadatana waa iga mid, Ciddaan qaadaninna iga Mid ma aha. (Ibnu Abii Xaatim).
Aayadda Kalana waxay ka Warrami inaan Eebe inoo qabanayn Dhaarta Carrabku xado ee midda loo qasdo umbaa laysu qaban, waxaana lagu kafaara Gutaa Haddaan la Falinin Toban Miskiin quudintood ama arrad Bixintood ama Xorayn Qoor, waase in la Dhawraa Dhaarta Eebana wax walba wuu Caddayn inaad ku Mahdisaan. Al-Maa'idah (87-89).

90. Kuwa Xaqa Rumeeyow Khamrada, qamaarka, Sanamyada «Taagan», iyo Faalku waa uun Xuman (Wasakh) oo Camal Shaydaana ee ka Fogaada inaad Liibaantaan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّمَا ٱلْخَمْرُ وَٱلْمَيْسِرُ وَٱلْأَنصَابُ
وَٱلْأَزْلَٰمُ رِجْسٌ مِّنْ عَمَلِ ٱلشَّيْطَٰنِ فَٱجْتَنِبُوهُ لَعَلَّكُمْ
تُفْلِحُونَ ﴿٩٠﴾

91. Wuxuu uun Dooni Shaydaanku inuu Idinku Dhextuuro Colnimo iyo isnac Khamrada iyo Qamaarka idinkana Celiyo Xusidda Eebe iyo salaadda ee ma ka Joogaysaan (ka Jooga).

إِنَّمَا يُرِيدُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَن يُوقِعَ بَيْنَكُمُ ٱلْعَدَٰوَةَ
وَٱلْبَغْضَآءَ فِى ٱلْخَمْرِ وَٱلْمَيْسِرِ وَيَصُدَّكُمْ عَن ذِكْرِ ٱللَّهِ
وَعَنِ ٱلصَّلَوٰةِ ۖ فَهَلْ أَنتُم مُّنتَهُونَ ﴿٩١﴾

92. Adeeca Eebe Adeecana Rasuulka Digtoonaadana, Haddaadse Jeedsataan Ogaada waxaa uun Rasuulkanaga Saaran Gaadhsiin Cadi.

وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ وَٱحْذَرُوا۟ ۚ فَإِن تَوَلَّيْتُمْ
فَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّمَا عَلَىٰ رَسُولِنَا ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿٩٢﴾

93. Dhib (Dambi) ma Saarra kuwa Xaqa Rumeeyey oo Camal Fiican Falay waxay Quuteen hadday Dhawrsadaan oy Xaqa Dhab u Rumeeyaan Camal Fiicanna Falaan, oy Xumaanta ka Dhawrsadaan oy Xaqa Rumeeyaan, Haddana Dhawrsadaan samana falaan, Eebana wuxuu Jecelyahay Samo Falayaasha.

لَيْسَ عَلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
جُنَاحٌ فِيمَا طَعِمُوٓا۟ إِذَا مَا ٱتَّقَوا۟ وَّءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟
ٱلصَّٰلِحَٰتِ ثُمَّ ٱتَّقَوا۟ وَّءَامَنُوا۟ ثُمَّ ٱتَّقَوا۟ وَّأَحْسَنُوا۟ ۗ
وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٩٣﴾

Khamrada iyo Qamaarka, iyo wax u Gawricidda iyo Xuska Sanamyada LaTaagay iyo Faalkuba waa waxyaalo xun oo Camal Shaydaana, oo Khayrka kaa Celin, Colnimo iyo Cadhana Beeri waana waaJib inuu Ruuxa Muslimka ah ka Fogaado Isagoo Eebe iyo Rasuulkiisa Adeeci, Ciddii Xaqa ka Jeedsatana waxba Rasuulka kama Saara oon Gaadhsiin Cad ahayn, Dadkiise falay wax ka mid ah waxaas Intaan la Xarrimin Dambi ma Saarra hadday Dhab Xaqa u Rumeeyaan ka dib oo Dhawrsadaan Camal fiicanna Falaan, ILLeen Eebaa Jecel sidaase, Xumaanta Khamrada, Qamaarka iyo waxa la midka ah wax qarsoon ma aha, waana Aakharo, Adduun, Caafimaad, Xoolo, Caqli iyo Sharaf waa, Inta Caqliga leh oo Dhanna waxay ku Kulmeen Xumaanta iyo waxyeelada Khamrada, waxaana ka warramay Xaaraannimadeeda iyo waxyeeladeedaa Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Waxaana Kamida Wax kastoo wax Waaliya waa Khamro waana Xaaraan. iyo Eebe ha Lacnado Khamrada, Kan Cabba, Kan Waraabiya, Kan Gada, Kan Gata, KanXambaara, Kan loo Xambaaro, Kan Miira, Kan loo Miiro iyo Kan Cuna Lacagteeda. Waxaa Wariyey (Imaam Axmed).
Bal day Xaalkeeda iyo Xumideeda, wataas Aragtida Islaamka ee Khamrada. wuxuuna Eebe Baneeyey waxyaalo Macaan oo Fiican oo la Cabbo, Maxayse ka heleen kuwa Baneeyey,waa uun Waalli, Cudur, Dil, Nabad-galyo Darro iyo Xumaan oo Dhan. ILLeen Khamro waa Hooyada Xumaantee, Maxaa ka fiican Islaamka iyo Wuxuu Fari Waana WaaJib in la Raaco. Al-Maa'idah (90-93).

---

94. Kuwa Xaqa Rumeeyow wuxuu idinku Imtixaami Eebe wax Ugaadha ka mid ah (Waqtiga Xajka) oo Gaadhayaan Gacmihiinnu iyo waramihiinnu in Eebe Muujiyo Cidda ka cabsata isagoo kali ah, Ciddiise xad gudubta intaas ka dib wuxuu Mudan Cadaab daran.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَيَبْلُوَنَّكُمُ ٱللَّهُ بِشَىْءٍ مِّنَ ٱلصَّيْدِ
تَنَالُهُۥٓ أَيْدِيكُمْ وَرِمَاحُكُمْ لِيَعْلَمَ ٱللَّهُ مَن يَخَافُهُۥ
بِٱلْغَيْبِ ۚ فَمَنِ ٱعْتَدَىٰ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَلَهُۥ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٩٤﴾

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَقۡتُلُواْ ٱلصَّيۡدَ وَأَنتُمۡ حُرُمٞۚ وَمَن
قَتَلَهُۥ مِنكُم مُّتَعَمِّدٗا فَجَزَآءٞ مِّثۡلُ مَا قَتَلَ مِنَ ٱلنَّعَمِ
يَحۡكُمُ بِهِۦ ذَوَا عَدۡلٖ مِّنكُمۡ هَدۡيَۢا بَٰلِغَ ٱلۡكَعۡبَةِ
أَوۡ كَفَّٰرَةٞ طَعَامُ مَسَٰكِينَ أَوۡ عَدۡلُ ذَٰلِكَ صِيَامٗا
لِّيَذُوقَ وَبَالَ أَمۡرِهِۦۗ عَفَا ٱللَّهُ عَمَّا سَلَفَۚ وَمَنۡ عَادَ
فَيَنتَقِمُ ٱللَّهُ مِنۡهُۚ وَٱللَّهُ عَزِيزٞ ذُو ٱنتِقَامٍ ٩٥

95. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha Dilina Ugaadha idinkoo Xarman, Ciddiise Disha oo idinka mid ah si kas ah waxaa Saaran wuxuu Dilay wax la mid ah oo Xoolo ah oy Xukumi labo Caadil ah oo idinka mid ah isagoo ah Hadiyad Gaadhi Kacbada, ama Kafaaro gud Quudin Masaakiin ama wax u Dhigma oo Soon ah inuu Dhadhamiyo Ciqaabta amarkiisa, wuu idinka Saamaxay Eebe wixii horreeyey Ciddiise ku Noqota wuu ka aarsan Eebe, Ilaahayna waa Adkaade Aarsada.

**Aayaduhu waxay ka warrami in waqtiga la xarmado xajka ama Cumrada ay Reebantahay in Ugaadha la Laayo, waxaana jirtay inuu Eebe ku Imtixaamay Muslimiintii Arrintaas si loo kala Caddaado Cidii saas Fashana way Xad-gudubtay, waxaana saaran inuu gudo Ugaadhuu Dilay wax la mid ah oo Xoolo ah, waxaana qiimayn Labo Caadil ah oo Muslimiinta ka mid ah, waxaana la geeyn Xaramka Makaad Sadaqo ahaan, haddii kale wuxuu quudin Masaakiin Qiimihiisa ama wuu Soomi si uu u Dhadhamiyo Ciqaabta Gafkiisa, intaan layska reebin wixii Dhacay waa ka Saamaxay Eebe, Cidii ku Noqotana wuu ka aarsan. Muqaatil Binu Xayaan wuxuu Yidhi: Waxay soo Degeen Cumradii Xudaybiyo, Taasina waxay ku Tusin inay Waajibtahay inuu Gawraco Waqtiga Ixraamka. Al-Maa'idah (94-95).**

---

أُحِلَّ لَكُمۡ صَيۡدُ ٱلۡبَحۡرِ وَطَعَامُهُۥ مَتَٰعٗا لَّكُمۡ
وَلِلسَّيَّارَةِۖ وَحُرِّمَ عَلَيۡكُمۡ صَيۡدُ ٱلۡبَرِّ مَا دُمۡتُمۡ حُرُمٗاۗ
وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ٱلَّذِيٓ إِلَيۡهِ تُحۡشَرُونَ ٩٦

96. Waxaa Laydiin Baneeyey Ugaadhsiga Badda iyo Cunnadeeda idinkoo ku intifaaci iyo Socdaalba, (Idinkoo Xarman) waxaana Laydinka Reebay ka Ugaadhsiga Barriga intaad Xarmantihiin, ka Dhawrsada Eebaha Xaggiisa Laydiin soo Kulmin.

۞ جَعَلَ ٱللَّهُ ٱلۡكَعۡبَةَ ٱلۡبَيۡتَ ٱلۡحَرَامَ قِيَٰمٗا
لِّلنَّاسِ وَٱلشَّهۡرَ ٱلۡحَرَامَ وَٱلۡهَدۡيَ وَٱلۡقَلَٰٓئِدَۚ ذَٰلِكَ
لِتَعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ يَعۡلَمُ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي
ٱلۡأَرۡضِ وَأَنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمٌ ٩٧

97. Wuxuu ka Yeelay ILaahay Kacbada Bayd (Guriga) Xurmada Leh, Dhawridda dadka iyo Bilaha Xurmada leh iyo Hadyada iyo Tan la Calaameeyey (Hadyada Darteed) waana inaad Ogaataan in Eebe Ogyahay waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka iyo in Eebe wax kasta Ogyahay.

ٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ وَأَنَّ ٱللَّهَ
غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٩٨

98. Ogaada in Eebe Ciqaabtiisu Darantahay Eebana yahay Dambi Dhaafe Naxariista.

99. Ma Saarra Rasuulka waxaan Gaadhsiin ahayn, Eebana waa Ogyahy waxaad Muujinaysaan iyo waxaad Qarinaysaan.

مَّا عَلَى ٱلرَّسُولِ إِلَّا ٱلْبَلَٰغُ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ
وَمَا تَكْتُمُونَ ﴿٩٩﴾

Aayadahanna waxay ka warrami in ILaahay u Banneeyey Muxrimka Xajka iyo Cumrada inuu Cuno waxa Badda laga soo Saaro, waxaase laga reebay ka Ugaadhsiga Barriga intay Xarmanyihiin waana inay ka Dhawrsadaan Eebaha Xaggiisa laysu soo Kulmin, Kacbadana wuxuu ILaahay ka Yeelay Guri Sharaf leh oo Xurma leh, Dadkana Maslaxo, iyo Nabadgalyo ugu Sugantahay, Sidoo kale Bilaha Xurmaysan iyo Had-yadda Xaramka loo wado, Arrintaasna waxaa ugu wacan in ILaahay Ogyahay waxa Samooyinka iyo Dhulka ku Sugan, iyo wax kastaba, waana in la Ogaado in Eebe Ciqaab daranyahay, Naxariistana, Rasuulkana waxaan Gaadhsiinta Xaqa ahayn ma Saarra, Eebana wuu Ogyahay waxa la Muujin iyo waxa la qarsanba,
Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Isagoo Badda ka Warrami waa Daahir Biyaheedu waana Xalaal Waxeeda Dhinta, (Imaam Axmed).
Waana waxyaalaha Eebe Dadka ugu Nicmeeyey, kuna Tusin Awoodda Eebe iyo Naxariistiisa oy Waajibna tahay in si Fiican oo Xaq iyo Caddaalad ah loogu Intifaaco laguna Aqoonsado Eebe iyo Deeqdiisa. Al-Maa'idah (96-99).

---

100. Waxaad Dhahdaa (Nabiyow) ma eka wax Xun iyo Wax Fiican Aadba la yaabtid Badnida kan Xune, kana dhawrsada Eebe Dadka Caqliga lahow inaad Liibaantaan.

قُل لَّا يَسْتَوِى ٱلْخَبِيثُ وَٱلطَّيِّبُ وَلَوْ أَعْجَبَكَ
كَثْرَةُ ٱلْخَبِيثِ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ يَٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ
لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٠٠﴾

101. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha Warsanina waxyaalo Haddii Laydiin Muujiyo idin Murug Galin, Haddaana Warsataan marka Quraanka la soo Dejin waa Laydiin Muujin, wuuna idinka Cafiyey Eebe Xaggeeda ILaahayna waa Dambi Dhaafe Dulbadan

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَسْـَٔلُوا۟ عَنْ أَشْيَآءَ
إِن تُبْدَ لَكُمْ تَسُؤْكُمْ وَإِن تَسْـَٔلُوا۟ عَنْهَا حِينَ يُنَزَّلُ
ٱلْقُرْءَانُ تُبْدَ لَكُمْ عَفَا ٱللَّهُ عَنْهَا وَٱللَّهُ
غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٠١﴾

102. Waxaa warsaday Qoom idinka Horreeyey Markaasay Noqdeen Kuwo ka Gaalooba (Markii loo Muujiyey).

قَدْ سَأَلَهَا قَوْمٌ مِّن قَبْلِكُمْ ثُمَّ أَصْبَحُوا۟
بِهَا كَٰفِرِينَ ﴿١٠٢﴾

Aayadahan waxay Caddayn inaan Xumaan iyo Wanaag Sinayn, si kasto how Badnaato Xumaantuye, waana inay Dhawrsadaan Dadka Caqliga leh ee wax Garadka ah, Waxaana Xadiith ku Sugnaatay: Wax Yar ood Gudato Shugrigiisa yaa kaaga Fiican wax badan oodan karin,
Taasina waxay ku tusin in waxa wanaagsani fiicanyahay wuxuu yahayba, waxa Xumina Qiimo daranyahay si kasto how batee ama wuxuu dooni ha Noqdee, waxaa kale oo aayadaha dambe ka warrami inaan la badinin Warsiga Macna la'aaneed iyo Ujeeddo Xumo Illeen Diintu waa Caddahaye, wixiise kaa Qarsooma waa inaad si Xushmad leh u Warsataa Ciddii Garan, waxayna Soo Degeen Aayaduhu mar Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) uu Khudbad Akhrinayey oo yidhi: Haddaad Ogtihiin waxaan Ogahay wax badanbaad ooyi lahaydeen, Wax yarna waad Qosli Lahaydeen Markaasay Asaxaabtii wajiga Dabooleen, Iyagoo ooyi, Markaasuu Nin warsaday Aabahay waa Kuma, Markaasay soo Degeen Aayaduhu, ILLeen Yuhuud iyo Nasaaro iyo Gaaladii kalaba waxay Warsan Jireen Warsi Xun iyo Madax adayg wayna ka Gaaloobi jireen Wax warso Laakiin Si Maamuusa iyo wax loo baahanyahay oo Macquula oo wax Tari. Al-Maa'idah (100-102).

103. Ma Yeelin Eebe Xoolo Caanahooda Sanamyada loo Bixiyo (Baxiira) iyo Xoolo Sanamyada loo siidaayo (Saa'ibo) iyo Xoolo Dhadig oo Sanamyada lagu sadaqaysto (Wasiilo) iyo Riti Sanamyada loo Daayo (Xaam) Laakiin kuwii Gaaloobay waxay ku Been abuuraan Eebe Been, Badankoodna wax ma Kasayaan.

مَا جَعَلَ ٱللَّهُ مِنۢ بَحِيرَةٖ وَلَا سَآئِبَةٖ وَلَا وَصِيلَةٖ
وَلَا حَامٖ وَلَٰكِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يَفۡتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ
ٱلۡكَذِبَۖ وَأَكۡثَرُهُمۡ لَا يَعۡقِلُونَ ١٠٣

104. Marka loo Yidhaahdo u Kaalaya waxa Eebe soo Dejiyey iyo Xagga Rasuulkana waxay dhahaan waxaa nagu Filan waxaan ka Hellay Aabayaalkanno, oo Hadday Aabbayaalkood ayna wax Ogayn Hanuunsanaynna(Ma raacayaan).

وَإِذَا قِيلَ لَهُمۡ تَعَالَوۡاْ إِلَىٰ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ وَإِلَى
ٱلرَّسُولِ قَالُواْ حَسۡبُنَا مَا وَجَدۡنَا عَلَيۡهِ ءَابَآءَنَآۚ
أَوَلَوۡ كَانَ ءَابَآؤُهُمۡ لَا يَعۡلَمُونَ شَيۡـٔٗا
وَلَا يَهۡتَدُونَ ١٠٤

105. Kuwa Xaqa Rumeeyow waxaa idin Saaran Naftiinna Idinma Dhibo Ciddii Dhunta Haddaad Hanuunsantaan, Xagga Eebe Umbaana Noqoshadiinnu tahay Dhammaan wuxuuna Idinka Warrami Waxaad Camal falayseen.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ عَلَيۡكُمۡ أَنفُسَكُمۡۖ لَا يَضُرُّكُم
مَّن ضَلَّ إِذَا ٱهۡتَدَيۡتُمۡۚ إِلَى ٱللَّهِ مَرۡجِعُكُمۡ جَمِيعٗا
فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ١٠٥

Jaahiliintii waxay ahaayeen kuwo aan Eebe si Fiican ugu Xidhnayn, Jaahil oo dhan Caadadiisu waa Saas, Xoolahoodana waxay u Bixin jireen waxaan Dar Eebe ahayn, sida Sanamyada iyo waxa la midka ah, Caanaha yey u Bixin Jireen Neefkana way u siidayn Jireen Sanamyada, Hadday Dhadig isku Xijisiisana ama Ritigu wax badan Rimiyo waxay u siidayn jireen SanamYada, waana Been Abuurasho aan Xujo lahayn, Marka Quraanka iyo Rasuulka loogu Yeedhana waxay Raacaan waxay Aabbayaalkood oon wax ogayn hanuunsanaynna ka heleen,Taasina waa Ceeb weyn,Tan Kale Markaad toosnaato xaqana si Dhab ah Dadka u Fartid Cidii Diida oo Dhunta waxba kaama Saarra, mana aha Ujeedada Aayaduhu inaan Xaqa la Farin ee Naftaada Kaliya uun Xil kaa Saaranyahay, ma aha saas waa inaad Wanaag si Fiican u farto, Xumaantana si Fiican uga Reebto ka dib Xil kuma Saarra, Waxaa jirta in Dadka qaarkood si qalada u Fahmeen Aayaddan, oy Dhaheen ani Naftayda umbaa i saaran ee maxaa Dad kale Hadduu Dhumi Iga Galay, ma jiro Cid kaligeed uun Toosnaan karta Dadkuna Dhunsanyahay, ILLeen Dadku waa Xubin kaliya oo kale, waxaana Khaladkaas ka waaniyey Dadka Sayid Abuu bakar oo Yidhi: Waxaad ku Fasirtaan Aayadda si aan sideedii ahayn, Wanaagga fara Xumaantana Reeba, Siduu Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Maa'idah (103-105).

---

106. Kuwa Xaqa Rumeeyow Maragga Dhexdiinna ah markii mid idinka mid ah Geeridu u Timaaddo uu Dardaarmi Waa Labo Caadil oo idinka mid ah, ama Labo Kale oon idinka mid ahayn, markaad Socdaal Tihiin oo Geeri idin Hesho, idinkoo ku Reebi Salaad Dabadeed iyagoo ku Dhaaran

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ شَهَٰدَةُ بَيۡنِكُمۡ إِذَا حَضَرَ
أَحَدَكُمُ ٱلۡمَوۡتُ حِينَ ٱلۡوَصِيَّةِ ٱثۡنَانِ ذَوَا عَدۡلٖ
مِّنكُمۡ أَوۡ ءَاخَرَانِ مِنۡ غَيۡرِكُمۡ إِنۡ أَنتُمۡ ضَرَبۡتُمۡ فِي
ٱلۡأَرۡضِ فَأَصَٰبَتۡكُم مُّصِيبَةُ ٱلۡمَوۡتِۚ تَحۡبِسُونَهُمَا

Eebe Haddaad Shakidaan inaanan ku Gadanayn Qiimo yar Qaraababa ha ahaadee qarinna mayno maragga Eebe Markaas aan noqonno kuwa Dambaabay.

مِنۢ بَعۡدِ ٱلصَّلَوٰةِ فَيُقۡسِمَانِ بِٱللَّهِ إِنِ ٱرۡتَبۡتُمۡ
لَا نَشۡتَرِي بِهِۦ ثَمَنٗا وَلَوۡ كَانَ ذَا قُرۡبَىٰ وَلَا نَكۡتُمُ
شَهَٰدَةَ ٱللَّهِ إِنَّآ إِذٗا لَّمِنَ ٱلۡأٓثِمِينَ 106

107. Haddii la Ogaado inay Muteen Dambi waxaa Meejooda Joogsan (oo la Dhaarin) Labo kale oo ah kuwa ugu Mudnaan Badan Dhaxalkiisa, wayna ku Dhaaran Eebe inuu Maragoodu ka Xaqsanyahay Maragooda, mana xadgudbaynno markaas aan Noqonno Daalimiin.

فَإِنۡ عُثِرَ عَلَىٰٓ أَنَّهُمَا ٱسۡتَحَقَّآ إِثۡمٗا فَـَٔاخَرَانِ يَقُومَانِ
مَقَامَهُمَا مِنَ ٱلَّذِينَ ٱسۡتَحَقَّ عَلَيۡهِمُ ٱلۡأَوۡلَيَٰنِ
فَيُقۡسِمَانِ بِٱللَّهِ لَشَهَٰدَتُنَآ أَحَقُّ مِن شَهَٰدَتِهِمَا
وَمَا ٱعۡتَدَيۡنَآ إِنَّآ إِذٗا لَّمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ 107

108. Saasaana u Dhaw inay Maragga ula Yimaadaan Sidiisa Fiican ama ay ka Cabsadaan in la Diido Dhaartooda intay Dhaartaan ka dib, ee ka Dhawrsada Eebe Maqlana Eebana ma hanuuniyo qoom Faasiqiina.

ذَٰلِكَ أَدۡنَىٰٓ أَن يَأۡتُواْ بِٱلشَّهَٰدَةِ عَلَىٰ وَجۡهِهَآ
أَوۡ يَخَافُوٓاْ أَن تُرَدَّ أَيۡمَٰنُۢ بَعۡدَ أَيۡمَٰنِهِمۡۗ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ
وَٱسۡمَعُواْۗ وَٱللَّهُ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلۡفَٰسِقِينَ 108

Aayadahani waxay ka warrami in Hadduu Ruux Socdaala Geeri u Timaaddo uu ku Dardaarmi Labo Caadil oo Muslim ah hortood haddii la Waayana labo kale, Iyagoo la Dhaarin Salaado dabadood inay Run Sheegi ooyan wax Khayaamayn, oyna qarinayn xaqa, Haddii la Shakiyana waxaa Badeli oo Dhaaran inay Xaqaas Muteen Labo ka mid ah kuwa ugu Dhaw kii Dhintay, waxayna ku Dhaaran in Iyagu ka runbadanyihiin, Saasaana u Toosan in Maragga ay u Gutaan iyadoo Saxiix ah si aan hadda ka Dib loo Celin Maragooda, Waana Eebe in laga yaabo, Xaqana la Maqlo, ILLeen ILaahay ma Hanuuniyo qoom Faasiqiin ah, Taasina waxay ku Tusin siduu Islaamku ugu Dadaali Dhawridda Xuquuqda Dadka, una qadarin Dadka Diinta haysta, una fari Caddaalad, Eebe ka Yaabid, Sharaf Dhawrid iyo Wanaag ku Dadaalid. Al-Maa'idah (106-108).

---

109. (Ka warran) Maalintuu Kulmin Eebe Rasuulada kuna dhihi Maxaa laydiinku Jawaabay oy Dhihi ma Ogin adiga unbaa Ogaal Badan waxa maqan.

يَوۡمَ يَجۡمَعُ ٱللَّهُ ٱلرُّسُلَ فَيَقُولُ مَاذَآ أُجِبۡتُمۡۖ
قَالُواْ لَا عِلۡمَ لَنَآۖ إِنَّكَ أَنتَ عَلَّٰمُ ٱلۡغُيُوبِ 109

110. (Xusuuso) Markuu Eebe dhihi Ciise Binu Maryamow Xusuuso Nicmadaydii korkaaga ahayd iyo hooyadaaba markaan kugu Xoojinay Ruuxii Daahirka ahaa (Jibriil) ood kula Hadlaysay Dadka sariir-ilmood iyo adoo meel dhaxaada, iyo Markaan ku Baray Kitaabka iyo Xigmadda, iyo Tawreed, Injiil, iyo Markaad ka Yeelaysay Dhoobada Sidii Shimbir Idankayga

إِذۡ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَى ٱبۡنَ مَرۡيَمَ ٱذۡكُرۡ نِعۡمَتِي
عَلَيۡكَ وَعَلَىٰ وَٰلِدَتِكَ إِذۡ أَيَّدتُّكَ بِرُوحِ
ٱلۡقُدُسِ تُكَلِّمُ ٱلنَّاسَ فِي ٱلۡمَهۡدِ وَكَهۡلٗاۖ
وَإِذۡ عَلَّمۡتُكَ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَٱلتَّوۡرَىٰةَ
وَٱلۡإِنجِيلَۖ وَإِذۡ تَخۡلُقُ مِنَ ٱلطِّينِ كَهَيۡـَٔةِ ٱلطَّيۡرِ

ood Afuufaysay oy Noqonaysay Shimbir Idankayga, ood Bogsiinaysay indhoole Ku dhashe iyo Baras laha Idankayga, ood soo Bixinaysay Maydka Idankayga, Markaan kaa kaafiyey Banii Israa'iil markaad ula timid Xujooyin, oy Dheheen kuwii Gaaloobay oo ka mida kani waxaan Sixir ahayn ma aha.

بِإِذْنِي فَتَنفُخُ فِيهَا فَتَكُونُ طَيْرًا بِإِذْنِي وَتُبْرِئُ
الْأَكْمَهَ وَالْأَبْرَصَ بِإِذْنِي وَإِذْ تُخْرِجُ
الْمَوْتَىٰ بِإِذْنِي وَإِذْ كَفَفْتُ بَنِي إِسْرَائِيلَ
عَنكَ إِذْ جِئْتَهُم بِالْبَيِّنَاتِ فَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا
مِنْهُمْ إِنْ هَٰذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١١٠﴾

111. Markaan u Waxyooday (ku-ILhaameeyey) Saaxiibadii Rumeeya aniga iyo Rasuulkayga oy dhaheen waan Rumaynay ee marag ka Noqo inaan Muslimiin nahay.

وَإِذْ أَوْحَيْتُ إِلَى الْحَوَارِيِّينَ أَنْ آمِنُوا بِي
وَبِرَسُولِي قَالُوا آمَنَّا وَاشْهَدْ بِأَنَّنَا مُسْلِمُونَ ﴿١١١﴾

Aayadahan waxay ka warrami Mucjisooyinkii Eebe Siiyey Nabi Ciise, Sida lagu soo Sheegay Suuradda Aal-Cimraan, waxaas oo Mucjiso ahna waxay ku Tusin Awoodda Eebe, iyo inuu isaga uun Khayrku ka Yimaaddo, wayna Waajibtahay in si Dhab ah loo Caabudo loona Raaco Sharcigiisa.
Nabi Ciisana waa Addoon Eebe oo la mid ah Nabiyada kale iyo Dadka, waana Doqonimo iyo Waalli in la siiyo Awood uusan Mudan ama lagu sheego ILaahnimo Sida Nasaaradu Citiqaadiso'sidee Ruux Caqli leh u Caabudi wax Eebaha wax walba abuuray ka soo hadhay, waa layaab, Eebe nama Dhumiyo.
Aayadda Hore iyadu waxay ka warrami inuu Eebe Qiyaamada warsan Rasuulada isagoo og waxay ugu Jawaabeen qoomkoodii'iyaguna Xaalkoo Dhan waxay u Celiyeen Eebe Khatarnimada Qiyaamada iyo Dhibaatada Taalla, Taasina waxay ku Tusin inay Wajibtahay Dhab u Caabudidda iyo ku Xidhnaanta Eebe iyo Raacidda Rasuulada. Al-Maa'idah (109-111).

---

112. (Xusuuso) Markay Dheheen Xawaariyiintii Ciise Ibnu Maryamow Ma karaa Eebahaa inuu nooga soo Dejiyo Xeedho (Cunno) Samada wuxuuna yidhi ka Dhawrsada Eebe Haddaad Mu'miniintihiin.

إِذْ قَالَ الْحَوَارِيُّونَ يَا عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ هَلْ
يَسْتَطِيعُ رَبُّكَ أَن يُنَزِّلَ عَلَيْنَا مَائِدَةً مِّنَ
السَّمَاءِ قَالَ اتَّقُوا اللَّهَ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١١٢﴾

113. Oyna Dheheen waxaannu dooni inaan wax ka Cunno oy Xasisho Quluubtanadu oon Ogaanno inaad Run noo sheegi oonu Noqonno Kuwa ka Marag kaca.

قَالُوا نُرِيدُ أَن نَّأْكُلَ مِنْهَا وَتَطْمَئِنَّ قُلُوبُنَا
وَنَعْلَمَ أَن قَدْ صَدَقْتَنَا وَنَكُونَ عَلَيْهَا
مِنَ الشَّاهِدِينَ ﴿١١٣﴾

114. Uuna Yidhi Ciise Binu Maryama Ilaahayow Eebahanow Nooga soo Deji Xeedho Samada u Noqota Ciid kaanaga hore iyo Kaanaga Dambe iyo Aayad Xaggaaga ka ahaatay nana Arzaaq adaa arzaaqe u Khayr roone.

قَالَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا أَنزِلْ عَلَيْنَا مَائِدَةً
مِّنَ السَّمَاءِ تَكُونُ لَنَا عِيدًا لِّأَوَّلِنَا وَآخِرِنَا
وَآيَةً مِّنكَ وَارْزُقْنَا وَأَنتَ خَيْرُ الرَّازِقِينَ ﴿١١٤﴾

115. Wuxuuna Yidhi Eebe waan ku soo Dejin Korkiinna ee Ciddii ka Gaalowda ka dib oo idin ka mid ah waxaan Cadaabi Cadaab Aanan Cadaabayn Ruux Caalamka ka mid ah.

قَالَ ٱللَّهُ إِنِّي مُنَزِّلُهَا عَلَيْكُمْ فَمَن يَكْفُرْ بَعْدُ
مِنكُمْ فَإِنِّيٓ أُعَذِّبُهُۥ عَذَابًا لَّآ أُعَذِّبُهُۥٓ
أَحَدًا مِّنَ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١١٥﴾

Aayadahan waxay ka warrami Maa'iddada lagu Magacaabay Suuradda, waxayna ka mid tahay Mucjisooyinka Eebe Nabi Ciise ku Manaystay, Taasoo ah inay warsadeen in Eebe Samada Cunno uga soo Dejiyo, markuu Nabi Ciise ka waaniyeyna waxay Sheegeen inay dooni inay wax ka Cunaan, Qalbigooduna Xasilo, Ogaadaanna Runta Nabi Ciise, Maragna ay ka Noqdaan, Markuu Nabi Ciise Baryey Eebe inuu u soo Dejiyo, si ay Ciid ugu ahaato mid hore iyo mid Dambaba, iyo Calaamadba, Eebana wuxuu u Yaboohay inuu soo Dejin, Ciddiise ka Gaaloowda wuxuu u Cadaabi Cadaab aan Cid kale la Cadaabin, Warsashada saasoo kale ahna waa laga Fiicanyahay, Ruuxu waa inuu Rumeeyo awoodda Eebe, wixii Anficina uu warsado, isagoon Madax adayg iyo Xumaan uga qasdin, Dhabtuna waa in Eebe wax walba ahaysiiyey, fali wuxuu Doono, Nabiyadana ay Run Sheegi, oyna Waajibtahay in Dhab loo Rumeeyo Dhammaan lana Raaco Xaqay u Yeedhi, si loo Liibaano. Al-Maa'idah (112-115).

---

116. (Xusuuso) Markuu Yidhi Eebe, Ciise Binu Maryamow Ma adaa ku Yidhi Dadka ka Yeesha ani iyo Hooyaday Ilaahyo Eebe ka sokow, uuna Yidhi waad Nasahantahay Iguma Haboona inaan Dhaho Waxaanan Xaq u lahayn, Haddaan idhina waad ogtahay, waxaadna Ogtahay waxa Naftayda ku sugan Anuguse kuma Ogi Adiga unbaa ah kan waxa Maqan Og.

وَإِذْ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ ءَأَنتَ قُلْتَ
لِلنَّاسِ ٱتَّخِذُونِي وَأُمِّيَ إِلَٰهَيْنِ مِن دُونِ ٱللَّهِ
قَالَ سُبْحَٰنَكَ مَا يَكُونُ لِيٓ أَنْ أَقُولَ مَا لَيْسَ لِي
بِحَقٍّ إِن كُنتُ قُلْتُهُۥ فَقَدْ عَلِمْتَهُۥ تَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِي
وَلَآ أَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِكَ إِنَّكَ أَنتَ عَلَّٰمُ ٱلْغُيُوبِ ﴿١١٦﴾

117. Kuma Dhihin waxaad i fartay waxaan ahayn, oo ah Caabuda Eebahay iyo Eebihiin waxaana ku ahay marag intaan ku Noolahay Dhexdooda markaad i oofsatana adaa ILaaliye u ah adi Umbaana wax walba Marag u ah.

مَا قُلْتُ لَهُمْ إِلَّا مَآ أَمَرْتَنِي بِهِۦٓ أَنِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ رَبِّي
وَرَبَّكُمْ وَكُنتُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا مَّا دُمْتُ فِيهِمْ
فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِي كُنتَ أَنتَ ٱلرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ
وَأَنتَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿١١٧﴾

118. Haddaad Cadaabto waa uun addoomadaadii, Haddaad u Dhaaftana adi umbaa Adkaade falsan ah.

إِن تُعَذِّبْهُمْ فَإِنَّهُمْ عِبَادُكَ وَإِن تَغْفِرْ لَهُمْ فَإِنَّكَ
أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١١٨﴾

Aayadahani waa Gooddi ILaahay u Jeediyey Nasaarada Caabuday Nabi Ciise iyo Hooyadiis, Isagoo Eebe ku Yidhi Nabi Ciise Ma adaa u Yidhi Dadka ILaah ka Yeesha aniga iyo Hooyaday Eebe ka sokow, Ilaahayna wuu Ogyahay inuusan Nabi Ciise Farin Xaalkaas ee waa Cabsi galin Kuwii Caabuday, Nabi Ciisana wuxuu ku Jawaabay in Eebe ka Nasahanyahay waxaas, Xaqna uma lihi inaan Sheegto waxaanan Mudan, Haddaan idhi iyo Haddii kalaba waad Ogtahay, waxaad ogtahay Naftayda waxa ku Sugan umase ogi anugu, Adiga unbaa wax walba oo Maqan og, Waxaan Eebe caabuda ahayn ma farin, Intaan Dhex-joogay anaa u Marag ah haddaad I Oofsatana Adaa ILaalin oo wax walba ka Marag ah, haddaad Cadaabtana waa Addoomadaadii, Haddaad u Dhaaftana Adigaa Adkaade Falsan ah,
Waana Kaas hadalkii Nabi Ciise, oo ah in Cibaadada Eebe Kaliya uu Farayey, Wax in la Caabudo Mudan oon Eebe ahayna ma Jiro, Isagoo Xaq u leh Cibaado iyo Waynaynba. Al-Maa'idah (116-118).

119. Wuxuu Yidhi Eebe Kani (Maanta) waa Maalinta ay Anfici kuwa Runta Sheega Runtoodu, waxaana u Sugnaaday Jannooyin oy Socoto Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda Waligood waxaana ka Raalli Noqday Eebe Iyana way ka Raalli Noqdeen, Taasina waa Liibaanta wayn.

قَالَ ٱللَّهُ هَٰذَا يَوْمُ يَنفَعُ ٱلصَّٰدِقِينَ صِدْقُهُمْ ۚ لَهُمْ جَنَّٰتٌ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۚ رَّضِىَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا۟ عَنْهُ ۚ ذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١١٩﴾

120. Eebaa Iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa ku Dhex sugan Eebana wax kasta (uu Doono) wuu Karaa.

لِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا فِيهِنَّ ۚ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌۢ ﴿١٢٠﴾

Eebana wuxuu Sheegay in Qiyaamada ay Anfici Runtu Ciddii Runle ahayd, oy Jannana Gali iyadoo ku Waari Eebaana ka Raalli Noqon Iyana way ka Raalli Noqon, Taasina waa Liibaan wayn, Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa ku Dhex-jirana Eebaa Iska leh wax walbana wuu Karaa, wax walbana Awooddiisay ku Jiraan, waxaana Run Sheegay Nabi Ciise iyo Inta la mid ah ee Cibaadada Eebe u qirtay, waxaana Been Sheegay Nasaarada iyo waxa la mid ah ee Caabudi wax Eebe ka Soo Hadhay. Al-Maa'idah (119-120).

# Suurat Al-Ancaam — سورة الأنعام

Magaca Eebe Yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista,

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mahad Eebaa iska leh ahna kan Abuuray Samooyinka iyo Dhulka, Yeelayna Mugdiyada iyo Nuurka, Kuwa Gaaloobayse Eebahood yey wax la simi (la Caabudi)

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَجَعَلَ ٱلظُّلُمَٰتِ وَٱلنُّورَ ۖ ثُمَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِرَبِّهِمْ يَعْدِلُونَ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan idinka Abuuray Dhoobo Markaas Xukumay Ajal (Muddo) Ajal Magacaaban Yaana Agtiisa ah, idinkuse Gaalooy waad Shakisantihiin.

هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن طِينٍ ثُمَّ قَضَىٰٓ أَجَلًا ۖ وَأَجَلٌ مُّسَمًّى عِندَهُۥ ۖ ثُمَّ أَنتُمْ تَمْتَرُونَ ﴿٢﴾